Gudida Waxbarashada Gobolka Utah

Qaybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah

XUQUUQDA WAXBARASHADA GAARKA AH EE WAALIDKA IYO ARDAYDA

OGAYSIISKA DHAWRITAANADA HABRAACEED

JANAAYO 2023

HAGAHA KAALMADA FARSAMEED EE GUDIDA WAXBARASHADA GOBOLKA UTAH

U hoggaansanka ADA: Janaayo 2023

TUSMADA QORAALKA

HORDHAC 1

Sharaxa Xarfaha Lasoo Uruuriyay ee Loogu Adeegsanayo Wargelintan 2

Macluumaadka Xidhiidhka 3

DHAWRITAANADA HABRAACEED IYO WARGELINTA 4

Wargelinta Waalidka/Koriyaha Sanadkii 4

Helitaanka Ilmaha 4

Deeqda Lacagta ee Deeqda Waxbarashada Baahiyaha Gaarka ah ee Waxbarashada Gaarka ah 4

Wargelinta Sharciga Xuquuqda iyo Sirta Waxbarashada Qoyska (FERPA) 5

Wargelinta Sanadkii ee Medicaid ee Hoos Timaada 34 CFR § 300.154(d)(2)(iv) ... 5

Wargelinta Duwaanka Utah ee Otisamka iyo Laxaad La'aanta Korniinka (URADD) 7

Macluumadka Guud 8

Wargelinta Qoraalka Ee Hore (34 CFR § 300.503; Shuruucda IV.C.) 8

Boosta Elektoroniga Ah (34 CFR § 300.505; Shuruucda IV.D.5.) 9

Ogolaanshaha Waalidka (34 CFR § 300.300; Shuruucda II.C.) 9

Fursada Waalidka ee Eegitaanka Duwaanada; Ka Qaybqaadashada Waalidka ee Kulamada (34 CFR § 300.501; Shuruucda IV.A.) 14

Qiimaynta Waxbarashada Madaxa Banaan 15

Waalidka Maxkamaddu Magacawday (34 CFR § 300.519; Shuruucda IV.T.) 17

Wareejinta Xuquuqda Waalidka da'da Qaangaadhnimada (34 CFR § 300.520; Shuruucda IV.U.) 18

SIRTA MACLUUMAADKA 19

Sirta Macluumaadka (34 CFR § 300.610 – 300.626; Shuruucda IV.V.; R277-487) 19

Wargelinta Waalidka ama Ardayga Qofka Wayn ah (34 CFR § 300.612; Shuruucda IV.V.3-4.) 19

Xuquuqda Gelitaanka (34 CFR § 300.613; Shuruucda IV.V.5.) 20

Wax kaga Beddelka Diiwaanada Codsiga Waalidka (34 CFR § 300.618; Shuruucda IV.V.10.) 21

Fursadaha Dhagaysiga (34 CFR § 300.619; Shuruucda IV.V.11.) 22

Nidaamyada Dhagaysiga (34 CFR § 300.621; Shuruucda IV.V.13.). 22
Dhawritaanada (34 CFR § 300.623; Shuruucda IV.V.15.) 24
Burburinta Macluumaadk (34 CFR § 300.624; Shuruucda IV.V.16.) 25
Xuquuqda Ardayga (34 CFR § 300.625; Shuruucda IV.V.17.) 25
Ardayda Qabta Laxaad la'Aanta ee ay Waalidkood Geliyeen Dugsiyo Gaar ah Marka FAPE ay soo Saarto (34 CFR § 300.148; Shuruucda VI.C.) 26
Foomamka Qaabka (34 CFR § 300.509; Shuruucda IV.I.) 29
Nidaamka Cabashada Gobolka (34 CFR §300.151–153; UCA 53E-7-208; Shuruucda IV.E.). 30
Nidaamka Cabashada Gobolka ee Guud 30
Xaraynta Cabashada Gobolka (34 CFR § 300.153; Shuruucda IV.E.) 31
Nidaamka Cabashada Gobolka ee Ugu Yar (34 CFR § 300.152; Shuruucda IV.E.) 32
Dhexdhexaadin (34 CFR § 300.506; Shuruucda IV.F.) 36
Nidaamyada Dhexdhaxaadinta Guud 36
Shuruudaha Dhexdhexaadinta 36
Dhexdhexaadnimada Dhexdhexaadiyaha 38
Nidaamka Cabashada Nidaamka 39
Xaraynta Cabashada Nidaamka (34 CFR § 300.507; UCA 53E-7-208; Shuruucda IV.G.) 39
Cabashada Nidaamka (34 CFR § 300.508; Shuruucda IV.H.) 40
Nidaamka Xalinta (34 CFR § 300.510; Shuruucda IV.J.) 42
Dhegaysiyada Cabashooyinka Nidaamka 45
Dhagaysiga Nidaamka oo Dhexdhexaad ah (34 CFR § 300.511; Shuruucda IV.K.) 45
Xuquuqda Dhagaysiga (34 CFR § 300.512; Shuruucda IV.L.) 46
Go'Aanka Dhagaysiga (34 CFR § 300.513; Shuruucda IV.M.) 47
Kama Danbaysnimada Go'Aanka (34 CFR § 300.514; Shuruucda IV.N.) 48
Qaabka Dhaqan Gelinta Gobolka (34 CFR § 300.537; Shuruucda IV.O.) 48
Mudada iyo Haboonaanta Wakhtiga Dhagasiga (34 CFR § 300.515; Shuruucda IV.P.) 48
Dacwada Madaniga ah (34 CFR § 300.516; Shuruucda IV.Q.) 49

Nidaamka Dacwada Madaniga ah ee Guud 49
Kharashka Looyarka (34 CFR § 300.517; UCA 53E-7-208(4)(B); Shuruucda IV.R.)50
Xaalada Ardayga Wakhtiga Dacwada (34 CFR § 300.518; Shuruucda IV.S.) 52
Nidaamyada Marka Ardayga Anshax Marinta La Marinayo uu Laxaad La' Yahay. 54
Awooda Shaqaalaha Dugsiga (34 CFR § 300.530; Shuruucda V.A. – C.) 54
Isbedelka Meelaynta ee ka Timaada ka Saarida Anshax Marinta ah (34 CFR § 300.536; Shuruucda V.D.) 56
Go'Aaminta Bandhiga (34 CFR § 300.530; Shuruucda V.E.) 57
Go'Aaminta Habdhismeedka (34 CFR § 300.531; Shuruucda V.G.) 59
Rafcaanka Waalidka, Ardayga Qofka Wayn ah, ama Dugsiga (34 CFR § 300.532; Shuruucda V.H.) 59
Meelaynta Mudada Rafcaanka (34 CFR § 300.533; Shuruucda V.I.) 61
Badbaadada Ardayda aan Weli u Qalmin Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada la Xidhiidha (34 CFR § 300.534; Shuruucda V.J.) 61
U Gudbinta iyo Talaabada Bilayska iyo Awood Maxkamadeed (34 CFR § 300.535; Shuruucda V.K.) 62

HORDHAC

Sharciga Waxbarashada Shakhsiga Laxaad La'aanta Qaba (IDEA), sharciga Federalka ee ku saabsan waxbarashada ardayda laxaadka la', wuxuu ku waajibiyaa dugsiyada inay siiyaan waalidka ardayda laxaadka la' ama ardayga wayn ee laxaadka la' (ardayga wayn) wargelin ay la socoto sharaxa buuxa ee dhawritaanada habraaceed ee hoos yimaada IDEA iyo shuruucda Waaxda Waxbarashada Maraykanka. Nuqulka wargelintan waa in la siiyo waalidka ama ardayga wayn kaliya hal mar sanad dugsiyeedka, marka laga tago nuqulka waa in la siiyo waalidka ama ardayga wayn:

1. Gudbinta hore marka la gaadho ama dalabka waalidka ama ardayga wayn si loo qiimeeyo;
2. Marka la helo cabashada Gobolka ee kowaad iyo marka la helo cabashada nidaamka kowaad ee sanad dugsiyeedka;
3. Marka go'aanka la gaadho in la qaato talaabo sharci oo dhigaysa waxka bedelka meelaynta; iyo
4. Marka ay dalbadaan waalidka ama ardayga wayn (34 CFR § 300.504(a)).

Ka arday ah qof wayn ahaan ama waalidka ardayda qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah, ama u qalma adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxa aad leedahay xuquuqo gaar ama dhawritaanada habraaceed ee hoos yimaada shuruucda Federalka iyo Gobolka. Xuquuqahan waxay ku qoran yihiin Wargelinta Dhawritaanadan Habraaceed. Liiskan xuquuqdaada waa in lagugu siiyaa luuqadaada ama qaab xidhiidh oo aad fahmi karto. Hadii aad doonayso inaad sharax dheeraad ah ka hesho xuquuqahan, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsiga ardaygaaga, masuulka dugsiga, maamulaha waxbarashada gaarka ah, Guddida Waxbarashada Gobolka Utah ee Qaybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa marka aad ka dalbato websaytka Gudida Gobolka Utah ee Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah (https://schools.utah.gov/specialeducation).

Adiga iyo dugsiga waxa aad wadaagtaan waxbarashada ardaygaaga ama taada. Hadii waalidka, ardayga qofka wayn ah, ama dugsigu qabo mushkilad ama tabasho ku saabsan waxbarashada ardayga ah, mushkilada waa in si furan looga wada hadlaa macalinta ardayga. Hadii marka aad la sheekeysato macalinka aanay xalin mushkilada, waalidka ama ardayga qofka wayn waxaa lagu dhiiri gelinayaa inuu la xidhiidho maamulaha waxbarasha gaarka ah ee degmo dugsiga/dugsiga gaarka loo leeyahay si loogu xaliyo mushkilada deegaanka.

SHARAXA XARFAHA LASOO URUURIYAY EE LOOGU ADEEGSANAYO WARGELINTAN

FAPE	Waxbarasho Bilaash ah oo Shacab oo Habboon.
IDEA	Qaybta B ee Xeerka Waxbarashada ee Shakhsiyaadka Laxaadka la'
IEP	Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah
LEA	Hay'ada waxbarashada deegaanka; dhamaan degmooyinka dugsiga Utah, Dugsiyada Utah ee Dhagoolka iyo Indhoolka, iyo dhamaan dugsiyada gaarka loo leeyahay ee shacabka ee Utah ee ku shaqeeya sharciga Gobolka ee aan ahayn dugsiyada LEA ee degmo dugsiga.
Shuruucda	Gudida Gobolka Utah ee Shuruucda Waxbarashada ee Waxbarashada Gaarka ah
USBE	Gudida Waxbarashada Gobolka Utah

Kalmada "maanta" waxay ka dhigan tahay kaalendareed, iyada oo wax kale lagu sheego oo la muujiyo moojee. Kalmada "dugsiga" waxay ka dhigan tahay LEA, iyada oo wax kale lagu sheego oo la muujiyo moojee.

MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA

Guddida Waxbarashada Gobolka Utah ee Qaybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah
250 E 500 S
PO Box 144200
Salt Lake City, UT 84114-4200
801-538-7587
Shuruucda iyo Siyaasadaha Waxbarashada Gaarka ah
(https://schools.utah.gov/specialeducation/programs/rulespolicies)

The Utah Parent Center
5296 Commerce Dr
Suite 302
Murray, UT 84107
801-272-1051 ama 1-800-468-1160 (Bilaash)
Utah Parent Center
(http://www.utahparentcenter.org)

The Disability Law Center
960 S Main St
Salt Lake City, UT 84101
1-800-662-9080 (Codka)
Adeegyada Gudbinta Fiidyawga ee Adeegyada Gudbinta Fiidyawga Sorenson
(https://apply.sorensonvrs.com/secured_ntouch_apply_form)
Foomka Macluumaadka Xidhiidhka Onlaynka ah
(http://www.disabilitylawcenter.org/contact/)
Xarunta Sharciga Laxaad La'aanta
(http://www.disabilitylawcenter.org/)

Xarunta Macluumaadka iyo Khayraadka Waalidka
Websaytka Hoyga Xarunta Waalidka
(http://www.parentcenterhub.org)

DHAWRITAANADA HABRAACEED IYO WARGELINTA

WARGELINTA WAALIDKA/KORIYAHA SANADKII

HELITAANKA ILMAHA

Waaxda waxbarashada gaarka ah ee hay'adaha waxbarashada deegaanka (LEAs) ee Gobolka oo dhan waxay isku dayayaan inay la xidhiidhaan shakhsiyaadka laxaadka la' ee u dhaxeeya da'da dhalashada iyo koob iyo labaatan jirka ah si waafaqsan sharciga Federalka, kaas oo dhigaya bixinta barnaamijyada waxbarashada bilaashka ah iyo/ama adeegyada qofkan la siinayo. Hadii ardaygu aanu indhaha si wanaagsan waxba uga arkaynin, dhaga culus yahay, hadalka, habdhaqanka ay ku adag yihiin, uu xawaaraha korniinkiisu aayar u socdo taas oo aan lamid ahayn ardayda da'diisa oo kale ah, uu qabo laxaad la'aan, ama mushkilad waxbarasho, ardayga waxaa dhici karta inuu laxaad la'aan qabo. Hadii aad garanayso wax arday ah oo aad ka shakisan tahay inuu u qalmo adeegyadan, oo ay kamid yihiin ardayda looga shakisan yahay inuu qabo laxaad la'aan, xataa hadii ardayda uu fasalba fasalka kale uga gudbo, uu ku jiro dugsi gaar loo leeyahay, aanu haysan guri, ama uu yahay soo galayti, fadlan la xidhiidh maamulaha dugsigaaga ama xafiiska waxbarashada gaarka ah ee degmo dugsiga aad degan tahay.

DEEQDA LACAGTA EE DEEQDA WAXBARASHADA BAAHIYAHA GAARKA AH EE WAXBARASHADA GAARKA AH

Deeqda Waxbarashada Baahiyaha Gaarka ah ee Carson Smith waxay bixisaa kharashka waxbarashada ee ardayda u qalanta ee qabta laxaad la'aanta ee ku jira dugsiyada gaarka ah ee u qalma. Deeqda waxbarashada ee ardayda u qalma waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee dugsiyada shacabka, waxbarashada dugsiga kahor ilaa fasalka 12aad (da'da 3-21 jir), ee waalidkii ay u doorteen dugsiga gaarka ah oo u qalma.

Barnaamijka Fursada Deeqda Waxbarashada ee Baahiyaha Gaarka ah waxaa weeye qaab doorasho waxbarasho loogu talo geley dadka degan Utah ee siiya kaalmada lacagta waxbarashada ardayda u qalma ee qaba laxaad la'aanta ee aan ku jirin dugsi shacab. Waxaa loogu talo geley ardayda u qalma waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee dugsiyada shacabka, xanaanada caruurta ilaa fasalka 1 aad ilaa 12 aad (da'da 5-21 jir), ee waalidkii ay u doorteen dugsiga gaarka ah oo u qalma ama kharashaadka kale ee u qalma.

Dalbadayaasha kale waxay ka eegi karaan macluumaadka barnaamijka ee faahfaahsan ee ku jira websaytka USBE Deeqda Lacagta Deeqda Waxbarashada

Baahiyaha Gaarka ah e Waxbarashada Gaarka ah (https://www.schools.utah.gov/specialeducation/programs/specialneedsscholarshipgrants).

Wargelinta Sharciga Xuquuqda iyo Sirta Waxbarashada Qoyska (FERPA)

Sharciga Xuquuqda iyo Sirta Waxbarashada Qoyska (FERPA) waxa uu siiyaa waalidiinta iyo ardayda ah 18 jirka ama ka wayn xuquuqo gaar iyada oo la eegayo duwaanada waxbarashada ardayga. Xuquuqdan waxaa kamid ah:

1. Xuquuqda eegitaanka iyo naqdinta ee duwaanada waxbarashada ardayda 45 maalmood gudahood kadib maalinta LEA ay hesho dalabka gelitaanka.
2. Xaquuqda lagu codsanayo bedelida diiwaanada waxbarashada ardayda oo waalidka ama ardayga xaqa uleh uu aaminsanyahay in aysan sax aheyn, marin habaabin ay tahay, ama hadii kale xadgudub ay ku tahay xaquuqda arimaha gaarka ah ee ardayga sida uu dhigayo FERPA.
3. Xuquuqda in la siiyo ogolaanshe qoran kahor inta ayna LEA bixin macluumaadka sheegi kara haybta qofka ee duwaanada waxbarashada ardayda ku jira, marka laga tago ilaa inta ogolaanshaha FERPA ee bixinta iyada oo ogolaanshe aan la doonin.
4. Xaquuqda loogu dirayo cabasho Waaxda Waxbarashada Maraykanka oo la xiriirta eedeyn guuldarooyin oo LEA in ay u hogaansanaato sharuudaha FERPA ah. Dhinaca doonayaa waxa uu ku xarayn karaa cabashada onleyna ahaan (https://studentprivacy.ed.gov/file-a-complaint) ama boosta ayuu cabashada ugu diri karaa cinwaanka soo socda:

    U.S. Department of Education
    Student Data Privacy Policy Office
    400 Maryland Avenue SW
    Washington DC 20202-8520

Wargelinta Sanadkii ee Medicaid ee Hoos Timaada 34 CFR § 300.154(d)(2)(iv)

Fullinta xeerarka IDEA waxa uu siiyaa xuquuqo gaar ah waalidiinta leh ardayda u qalma iyo ardayda u qalma ee ah qofka wayn kuwaas oo la xidhiidha awooda helitaanka caymiska gaarka ah oo ah LEA ama faa'idooyinka bulshada, sida Medicaid, si ay gacan uga geysato lacag bixinta adeegyada qaarkood oo dugsiga laga bixiyo. Xaquuqdaan waa sida soo socota:

1. Waalidka iyo ardayga wayn waxa uu xaq u leeyahay inuu ku helo wargelinta luuqad uu fahmayo. LEA waa inay siisaa wargelinta ogaysiiska

ee qoran ee sanadkii ee xuquuqda waalidka ama ardayda qofka wayn ah, taas oo ku qoran luuqad ay fahmayaan shacabku guud ahaan; oo sidoo kale waxay ku siiyaan luuqada ay u dhasheen waalidka ama ardaygu qofka wayn ahi ama qaab kale oo macluumaadka loogu gaadhsiinayo waalidka ama ardayga qofka weyn ah, iyada oo ayna macquul ahayn moojee in sidaa la sameeyaayi.

2. Macluumaadka sirta ah ee ardayga lama bixin karo bilaa ogolaanshe. Heshiiska waalidka ama ardayga qofka weyn ah waa in lagu helaa sida waafaqsan xeerarka FERPA (34 CFR § 99) iyo xeerarka (34 CFR § 300.622) IDEA ka hor inta LEA uusan u shaacin, oo sheeganayo ujeedooyinka, warbixinta aqoonsiga shaqsiga ee ardayga (PII) hay'ada masuulka ka ah maamulka faa'idooyinka bulshada Gobalka ama barnaamijka caymiska (tusaale., Medicaid).
3. Ardayda qaba laxaad la'aanta waxay xaq u leeyihiin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha oo bilaash ah. Tani waxay ka dhigan tahay in iyada oo la eegayo adeegyada loogu baahan yahay siinta FAPE arday u qalma sida uu dhigayo IDEA, LEA:
    a. Waxaa dhici karta in waalidka ama ardayga qofka wayn ah in aan looga baahan in uu ku biiro ama is diiwaangeliyo gunooyinka shacabka ama barnaamijyada caymiska si ardaydoodu ay u hesho FAPE;
    b. Waxaa dhici karta in waaladiinta ama ardayga qofka wayn ah in aan looga baahan inay galaan qarashaadka baxo sida lacagta la bixiyo caymiska ka hor ama wadaaga caymiska oo loo galay xaraynta dacwad adeegyada la bixiyay ah iyada oo la raacayo qeybtaan, laakin laga yaabo in uu bixiyo kharashka waalid ama ardayda qofka wayn ah looga baahan lahaa in uu bixiyo haddii ay si kale noqon lahayd;
    c. Waxa dhici karta in aan la isticmaalin gunnooyinka ardayga sida waafaqsan gunnooyinka shacabka ama barnaamijka caymiska hadii isticmaalkaas ay:
        i. Hoos u dhigayso caymiska nolosha ama wixii kale ee gunooyin caymis ah;
        ii. Keenayso in qoysku bixiyo kharashka adeegyada oo aheyd hadii kale in ay ku daboolnaato gunnooyinka shacabka ama barnaamijka caymiska taas oo looga baahanyahay ardayda waqti aan ahayn ka ardaygu uu dugsiga ku jiro;
        iii. Kordhinayso lacagta caymiska ama keenayso joojinta gunnooyinka ama caymiska; ama
        iv. Keenayso khatar ah luminta u qalmitaanka guri iyo dhaafida bulshada ku saleysan, oo ku saleysan isku darka qarashaadka caafimaadka-la xiriiro.

4. Waalidka ama ardayda ah qofka wayn waxa uu ka noqon karaa ogolaanshaha wakhti kasta. Marka waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu siiyo ogolaanshaha bixinta macluumaadka sirta ah ee ku saabsan ardayda hay'ada ka masuulka ah maamulida barnaamijka gunooyinka ama caymiska shacabka ee Gobolka (sida, Medicaid), waalidka ama ardayga qofka wayn ahi waxa uu leeyahay xuquuq hoos timaada shuruucda FERPA oo ah inuu ka noqon karo ogolaanshaha markasta oo uu doonayo.
5. Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu diido ogolaanshaha, ama uu ka noqdo ogolaanshaha, LEA waxay weli bixinaysaa adeegyada loo baahan yahay oo bilaash ah. Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu diido in uu siiyo ogolaansho shaacinta warbixinta aqoonsiga gaarka ah hay'ada masuulka ka ah maamulka barnaamijka gunnooyinka ama caymiska bulshada Gobalka (tusaale., Medicaid), ama, hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu ogolaansho dhiibto balse hadhawdiina uu ka laabto ogolaanshaha, taasi meesha kama saarayso masuuliyada LEA ee ah hubinta in adeegyada loo baahanyahay oo dhan lagu siiyay bilaash waalidka ama ardayga qofka wayn ah.

Wargelinta Duwaanka Utah ee Otisamka iyo Laxaad La'aanta Korniinka (URADD)

Wargelintan waxa loogu talogalay inay kugu wargeliso ka qayb gelinta mustaqbalka ee ilmahaaga ee Diiwaanka Utah ee Otisamka iyo Naafooyinka Koboceed (URADD) iyo Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) Shabakaddeeda La Socodka Otisamka Utah iyo Naafooyinka Koboceed (UT-ADDM). Xogta ardaygaagu lama siin doono, marnaba, cid aan ahayn shaqaalaha URADD ama CDC.

Ka arday qof wayn ah ama waalid u qalma inuu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad ka baxdo kaydka xogta waxbarashada URADD iyo UT-ADDM markii aad doonto. Hadii aad doonayso inaad dalbato in xogta ardayga aan la wadaagin, fadlan gaadhsii maamulahaaga waxbarashada gaarka ah ee LEA 30 maalmood gudahood oo ka bilaabma marka aad heshid wargelintan. Hadii, wakhti danbe, aad doonayso in la masaxo xogta ardaygaaga, waxa aad la xidhiidhaa maamulahaaga waxbarashada gaarka ah ee LEA.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ADDM Network, waxa aad ka heli kartaa websaytka CDC (https://www.cdc.gov/ncbddd/autism/addm.html).

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan URADD, waxaa laga heleyaa websaytka Jaamacadda Dugsiga Caafimaadka Utah ee (https://medicine.utah.edu/psychiatry/research/labs/uradd/).

MACLUUMADKA GUUD

WARGELINTA QORAALKA EE HORE (34 CFR § 300.503; SHURUUCDA IV.C.)

OGAYSIIS

Wargelinta qoraalka ee hore waa in la siiyaa waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayda qofka wayn ah wakhti macquul ah kahor inta aan dugsigu:

1. Soo jeedin bilawga ama waxka bedelka aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxabrashada ardayda ama siinta waxbarashada shacabka munaasabka ee bilaashka ah ee (FAPE) ardayga; ama
2. Diidin bilawga ama waxka bedelka aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxabrashada ardayda ama siinta FAPE ardayga.

WAXA AY KA KOOBAN TAHAY WARGELINTU

Ogaysiiska qoran waa in ay ku jiraan:

1. Sharaxa talaabada uu ku taliyay ama diiday dugsigu;
2. Sharaxa sababta dugsigu ugu taliyey ama u diiday in uu qaado talaabo;
3. Faahfaahin hab, qiimeyn, diiwaan, ama warbixin kasta oo qiimeynta ah oo dugsiga adeegsaday isaga oo ku salaynaya talaabada lagu taliyey ama la diiday;
4. Warbixinta ah in waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga qofka wayn ah uu qabo badbaado sida ay dhigayaan dhawritaanada habraaceed ah ee IDEA iyo, hadii wargelintan aanay ahayn gudbinta qiimeynta hore, qaabka nuqulka sharaxa dhawritaanada habraaceed loo heli karo;
5. Ilaha waalidka ama ardayga ah qofka wayn ay tahay inuu la xidhiidho si uu u helo kaalmo ah fahanka bixinta IDEA;
6. Faahfaahin ikhtiyaarada kale ee Kooxda IEP looga fekeray iyo sababaha ikhtiyaaradaa loo diiday; iyo
7. Sharaxa qoddobada kale ee la xidhiidha ujeedada soo jeedinta ama diidmada dugsiga.

WARGELINTA OO KU QORAN LUUQAD LA FAHMI KARO

Wargelinta waa inay:

1. Ku qornaato luuqad ay fahmi karaan shacabka guud; oo

2. Lagu bixiyaa luuqada hooyo ee waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama qaab kale oo xidhiidh oo uu isticmaalo waalidka ama ardayga qofka wayn ah, iyada oo ayna macquul ahayn moojee.

Hadii luuqada uu u dhashay ama qaabka kale ee xidhiidhka ee waalidka ama ardayga ee qofka wayn ahi ayna lahayn luuqad qoraal ah, dugsigu waa inuu qaadaa talaabooyin uu ku xaqiijinayo in:

1. Wargelinta loogu turjubo af ahaan ama qaab kale oo waalidka ama ardayga qofka wayn ah luuqada ay u dhasheen waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama qaab kale oo xidhiidh;
2. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah uu fahmayo waxa ay ka kooban tahay wargelinta; iyo
3. Tani ay cadeyn qoran u tahay in shuruudihii la buuxiyey.

LUUQADA UU U DHASHAY QOFKU

Luuqada uu u dhashay qofku (34 CFR § 300.29; Shuruucda I.E.34.), marka loo isticmaalayo shakhsiga uu xadidan yahay aqoontiisa Ingiriisigu (LEP), waxay ka dhigan tahay sida soo socota:

1. Luuqada caadiyan uu isticmaalo shakhsigaasi; ama, ardayda aan ahayn qofka wayn, luuqada ayaa ah caadiyan ta uu u isticmaalo waalidka ardaygu dhammaan xidhiidhka tooska ah ee uu la yeesho ardayga (waxaa kamid ah qiimeynta ardayga), luuqada uu caadiyan ku isticmaalo ardaygu gurigiisa ama deegaankiisa waxbarasho.
2. Shakhsiga qaba dhago la'aanta ama indho la'aanta, ama shakhsiya aan lahayn luuqad qoran, qaabka xidhiidh ee caadiyan uu isticmaalo shakhsigu (sida luuqada dhagoolka, farta indhoolka, ama hadalka afka).

BOOSTA ELEKTOROONIGA AH (34 CFR § 300.505; SHURUUCDA IV.D.5.)

Waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga ah qofka wayn waxa uu dooran karaa inuu helo wargelin qoran oo hore, wargelinta dhawritaanada habraaceed, iyo wargelinta qoran ee hore kadib marka uu ay dhamaato dacwadda nidaamka si waafaqsan Shuruucda IV.H.6 ee xidhiidhka boosta elektorooniga ah, hadii dugsiygu uu sameeyo ikhtiyaar la heli karo.

OGOLAANSHAHA WAALIDKA (34 CFR § 300.300; SHURUUCDA II.C.)

QEEXITAANKA OGOLAANSHAHA WAALIDKA

Ogolaanshuhu (34 CFR § 300.9; Shuruucda I.E.9.) waxa uu ka dhigan yahay in:

1. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah si buuxda loogu sheegey dhamaan macluumaadka la xidhiidha hawlaha ogolaanshaha loo dalbanayo, luuqadda ay u dhasheen waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, ama qaabka kale ee xidhiidhka ah.
2. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah uu fahmay oo uu ogolaaday iyada oo qoraal ah in la sameeyo hawlaha waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, ogolaanshaha looga doonayo, iyo in ogolaanshuhu sharxo hawshaas oo uu qoro duwaanada (hadii ay jiraan) ee la bixin karo iyo cida la siinayo.
3. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah uu fahansan yahay in bixinta ogolaanshaha ay ka tahay ikhtiyaar dhinaca waalidka ama ardayga qofka wayn ah oo uu ka noqon karo wakhti kasta. Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu ka noqdo ogolaanshaha, in ka noqoshadaasi ayna hayn mid wixii hore masaxaysa (sida, ma saamaynayso wax tallaabo ah oo dhacay wixii ka danbeeyay markii oggolaanshaha la bixiyay oo ka horeeyay markii laga noqday oggolaanshaha).
4. Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu ka noqdo ogolaanshaha iyada oo qoraal ah si uu ardaygu u qaato waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, dugsiga inaan looga baahneyn in uu wax ka badalo duwaanka waxbarashada ardayga si uu meesha uga saaro tixraaca helitaanka ardayga ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha maadaama oo ay jirto ka noqoshada oggolaanshahani.

OGOLAANSHAHA QIIMAYNTA HORE

Dugsigu waxa uu ku taliyaa in la sameeyo qiimaynta hore ee lagu ogaanayo hadii ardaygu uu u qalmo arday qaba ahaan laxaad la'aan IDEA waa inuu, kadib marka la siiyo wargelinta qoraalka ah ee hore waalidka ama ardayda qofka wayn ah, ka helaa ogolaanshaha laga warqabo (sida lagu sharaxay cinwaanka Wargelinta Qoraalka Hore iyo Qeexitaanka Ogolaanshaha Waalidka) waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah kahor inta aan qiimaynta la samaynin.

Ogolaanshaha waalidka ama ardayga ah qofka wayn ee qiimaynta hore waa in aan loo arag ogolaanshe bixin hore oo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Dugsigu waa inuu dadaal macquul ah sameeyaa uu ku heleyo ogolaanshaha laga warqabo ee waalidka ama ardayga qofka wayn ah bilawga qiimaynta ee lagu ogaanayo hadii ardayga uu yahay arday qaba laxaad la'aan.

Marka la sameynayo qiimaynta cilmi nafsiga, dugsigu waa inuu dhaqan geliyaa shuruudaha waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee ogolaanshaha ee UCA 53E-9-203 (Sirta Ardayga iyo Ilaalinta Xogta).

Hadii waalidka ardayda ama ardayga qofka wayn ah ee ku jira dugsiga shacabka ama doonaya inuu ku biiro dugsiga shacabka aanu bixin ogolaanshaha qiimaynta hore ama ka jawaabi waaya dalabka bixinta ogolaanshaha, dugsigu waxa uu, iyada oo aanay waajib ku ahayn, dooni karaa qabashada qiimaynta hore ee ardayda iyaga oo isticmaalaya dhaxdhexaadinta IDEA ama cabashada nidaamka, kulanka xalinta, iyo nidaamka dhagaysiga dacwadda nidaamka dhexdhexaadka ah. Dugsigu kuma xad gudbo waajibaadkiisa si loo helo, ogaado, oo loo qiimeeyo ardayda hadii aanay sii wadin qiimeynta ardayga duruufahan.

Sharuucda Khaaska ah ee Qiimaynta Hore ee Xarumaha Carruurta Lagu Hayo ee Gobolka

Wixii kaliya ah qiimaynta hore, hadii ardaygu ku jiro meelaha carruurta lagu hayo ee Gobolka oo aanu la deganayn waalidka ardayga, dugsiga ku waajib maaha inuu ka helo ogolaanshaha laga warqabo waalidka hadii:

1. Inkasta oo la sameeyay dadaal macquul ah, dugsigu uu waayay macluumaadka meesha ay ku sugan yihiin waalidka ardaygu;
2. Xuquuqda waalidka ee ardayga meesha looga saaray si waafaqsan sharciga Gobolka; ama
3. Xuquuqda waalidka ee gaadhitaanka go'aamada waxbarashada uu joojiyay xaakin si waafaqsan sharciga Gobolka oo ogolaanshaha qiimaynta hore uu bixiyey shakhsiya uu xaakinku magacaabay in uu wakiil ka ahaado ardayga.

Ogolaanshaha Waalidka ee Adeegyada

Dugsiga ka masuulka ah u diyaarinta FAPE ardayga qaba laxaad la'aanta waa inuu ka helaa ogolaanshe laga warqabo waalidka ardayda ama ardayga qofka wayn ah kahor bixinta hore ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ardayga.

Dugsigu waa inuu dadaal macquul ah sameeyaa uu kaga heleyo ogolaanshaha laga warqabo waalidka ama ardayga qofka wayn ah bilawga siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiiidha ardayga.

Hadii waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ahi uu ka jawaabi waayo dalabka, ama diido ogolaanshaha, bilawga bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, dugsigu:

1. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalin dhawritaanada habraaceed (sida, dhexdhexaadinta, cabashada nidaamka, kulanka xalinta, ama dhegaysiga cabashada nidaamka dhexdhexaadka ah) si uu u helo heshiis ama xukun ah in adeegyada lasiin karo ardayga;

2. Looma arki doono inuu ku xag gudbay shuruudaha u diyaarinta FAPE ardayga maadaama oo uu siin waayay ardayga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee dugsigu uu ogolaanshaha u dalbaday; oo
3. Waajib kuma noqon doonto inuu qabto kulanka Kooxda IEP ama u sameeyo IEP ardayda waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee dugsigu uu u dalbaday ogolaanshaha.

Hadii, wakhti kasta oo ka danbeeya bixinta waxbarashada gaarka ah ee hore iyo adeegyada la xidhiidha, waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah uu ka noqdo ogolaanshaha iyada oo qoraal ah sii waditaanka bixinta waxabrashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, dugsigu:

1. Waxaa dhici karta inaanay sii wadin siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ardayga laakiin waa in uu bixiyaa wargelin qoraal ah oo hore, sida lagu sheegey cinwaanka Wargelin Qoraal ah oo Hore, kahor inta aanay joojin bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha;
2. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalin dhawritaanada habraaceed (sida, dhexdhexaadinta, cabashada nidaamka, kulanka xalinta, ama dhagaysiga cabashada nidaamka dhexdhexaadka ah) si uu u helo heshiis ama xukun ah in adeegyada lasiin karo ardayga;
3. Looma tixgelin doono inuu ku xad gudbay shuruudaha u diyaarinta FAPE ardayga haddii uu siin waayo ardayga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee dugsigu uu ogolaanshaha u dalabday; oo
4. Kuma aha waajib inuu qabto kulanka Kooxda IEP ama u sameeyo IEP ardayda si loosii siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha oo dheeraad ah ee dugsigu uu u dalbaday ogolaanshaha.

Ogolaanshaha Waalidka ee Dib u Qiimaynta

Dugsigu waa inuu ka helaa ogolaanshe laga warqabo waalidka ama ardayga qofka wayn ah si ay ugu sameeyaan wixii dib u qiimayn ah ardayga qaba laxaad la'aanta.

Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu diido ogolaanshaha dib u qiimaynta, dugsigu waxa uu, iyada oo aanay waajib ku ahayn, samayn karaa dib u qiimaynta ardayda isaga oo isticmaala dhexdhexaadin, samayn karaa cabasho nidaam, kulan xalinta ah, iyo habraacyada dhegaysiga cabashada nidaamka dhexaadka ah oo uu ku doonayo in wax lagaga badalo diidmada ogolaanshaha ee waalidka ama ardayga, ee qofka wayn ah, dib u qiimaynta ardayga.

Dugsigu kuma xad gudbo waajibaadkiisa si loo helo, ogaado, oo loo qiimeeyo ardayda hadii uu diido in uu sameeyo dib u qiimaynta.

Ogolaanshaha waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee laga warqabo loogama baahna in la helo hadii dugsiga uu muujiyo in:

1. Dadaal macquul ah uu galay oo lagu heleyo ogolaanshahan; oo
2. Waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah uu ka jawaabi waayay.

CADDAYMAHA DEDAALKA MACQUULKA AH SI LOO HELO OGOLAANSHAHA WAALIDKA

Dugsigu waa in uu hayaa cadaymaha dedaalka macquulka ah ee uu u galay si uu u helo ogolaanshaha laga warqabo ee waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee qiimaynta hore, si ay u bixiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha wakhtiga ugu horaysa, si ay u qiimeeyaan, oo ay u helaan meesha ay ku sugan yihiin waalidiinta carruurta uu gobolku xanaaneeyo si dib u qiimayn loogu sameeyo.

Cadaymahan waa in ay ku jiraan diiwaanka isku dayada dugsiga ee meelahan, sida:

1. Diiwaan faahfaahsan oo telefoonadii la diray ama la isku deyay iyo natiijooyinjkii telefoonadaas;
2. Nuqulada farriimaha loo diray waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo wixii jawaabo ah ee laga heley; iyo
3. Duwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka loogu tegey waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, guriga ama goobta shaqada iyo natiijada booqashooyinkan.

SHURUUDAHA OGOLAANSHAHA WAALIDKA EE KALE

Ogolaanshaha waalidka ama ardayga ah qofka wayn looma baahna kahor:

1. Dib u eegida xogta hore iyada oo qayb ka ah qiimaynta ama dib u qiimayta; ama
2. Bixinta imtixaanka ama qiimaynta kale ee la siiyo dhamaan ardayda iyada oo ogolaanshaha looga baahan yahay moojee dhamaan ardayda kahor inta aan la bixin imtixaanka ama qiimaynta.

Dugsigu waxaa dhici karta in aanu isticmaalin waalidka ama ardayga qofka wayn ah, diidmadiisa ogolaanshaha adeeg ama hawl hoos timaada Sharciga II.C.1.-3. (Sida, ogolaanshaha waalidka ee qiimaynta hore, ogolaanshaha walaidka ee adeegyada, ama ogolaanshaha waalidka ee dib u qiimaynta) si loogu diido waalidka ama ardayga wixii adeegyo kale ah, guno, ama hawlaha dugsiga, marka laga reebo wixii ay waajibinayaan Shuruucda II.C.

Hadii waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah ee guriga wax ku dhigta ama ku jira dugsiga gaar loo leeyahay oo ay geliyeen waalidka ama ardayga qofka wayn ah oo is ay iskaga bixiyaan lacagtooda ma bixiyaan ogolaanshaha bilawga qiimaynta ama dib u qiimaynta, ama waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee ka jawaabi waayay dalabka bixinta ogolaanshaha, dugsigu uma isticmaali karo nidaamka xalinka muranka (sida, dhexdhexaadin, cabashada nidaamka, kulanka xalinta, ama

dhegaysiga cabashada nidaamka dhexdhexaadinta ah) ee lagu badalayo nidaamka ogolaanshaha oo aan loogu baahnayn si loogu tixgeliyo ardayga ka arday u qalma ahaan in uu helo adeegyada loo siman yahay (adeegyada ay helaan qaar kamid ah ardayga leh laxaad la'aanta ee dugsiga gaarka ah ee waalidku geliyay).

Iyada oo waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu ka noqdo moojee ogolaanshaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ama diidmada ogolaanshaha ee meelaynta hore, wixii muran ah ee ku saabsan bixinta adeegyada IEP waa inay xaliyaan Kooxda IEP oo uu keeni karaa IEP dhamaystiran taas oo ay kamid yihiin dhamaan qaybaha daruuriga ah ee bixinta FAPE.

Fursada Waalidka ee Eegitaanka Duwaanada; Ka Qaybqaadashada Waalidka ee Kulamada (34 CFR § 300.501; Shuruucda IV.A.)

Fursada Waalidka ee Eegitaanka Duwaanada

Waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga qofka wayn ahi waa in la siiyaa, sida ay dhigayaan Shuruucdu, fursad eegitaan iyo naqdin dhamaan duwaanada waxbarashada ee ogaanshaha, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarashada ee ardayga iyo siinta FAPE ardayga.

Ka Qaybqaadashada Waalidka ee Kulamada

Waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga qofka wayn ahi waa in la siiyaa fursad uu kaga qayb geli karo kulanka ogaanshaha, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarashada ee ardayga iyo siinta FAPE ardayga.

Dugsi kastaa waa in uu bixiyo wargelinta, waafaqsan Shuruucda, si loo xaqiijiyo in waalidka ardayga laxaadka la' ama ardayga qofka wayn ahi in uu helo fursad uu kaga qayb geli karo kulanka.

Kulanka kama mid aha wada sheekeysiga aan rasmiga ahayn ama aan la balansan ee lala yeesho shaqaalaha dugsiga iyo wada sheekeysiga arrimaha sida qaabka waxbarashada, qorshayaasha duruusta, ama isku duba ridka bixinta adeega. Kulanka sidoo kale kama mid a aha hawlaha diyaar garawga ee shaqaalaha dugsigu ay ku samaynayaan curinta soo jeedin ama ka jawaabida soo jeedinta waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee lagaga hadli doono kulanka danbe.

Dugsi kastaa waa inuu xaqiijiyaa in waalidka arday kastaa oo qaba laxaad la'aan ama ardayga qofka wayn ah uu xubin ka yahay wixii koox ah ee gaadhaya go'aamada meelaynta waxbarashada ee ardayga (34 CFR § 300.327), waxaa kamid ah wargelinta waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee kulanka hore si loo xaqiijiyo

in ay fursad u helaan inay ka qayb galaan oo ay qabsadaan balan kulan oo ay labada dhinacba ku heshiiyeen wakhtiga iyo meesha uu ka dhacayo (34 CFR § 300.322(a)).

Wargelinta kulanka waa in lagu sheego ujeedka, saacada, iyo goobta kulanka, cida ka qayb geli doonta, oo waa in ay u sheegtaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah xuquuqdooda inay soo kaxaystaan shakhsiyaadka kale ee garanaya ama khabiirada gaarka ah ee ardayga (34 CFR § 300.322(b)).

Haddii waalidka iyo ardayga qofka wayn ah toona ay ka qayb gali kari waayaan kulanka go'aanka lagu gaadhayo ee la xidhiidha meelaynta waxbarashada ardayga, dugsigu waa inuu isticmaalaa qaab kale oo lagu xaqiijinayo ka qayb galkiisa, oo waxaa kamid ah wada sheekeysiga gaar gaarka ah ama kooxeed ee taleefanka ah, ama kulanka maqal iyo muuqaalka ah.

Go'aanka meeleynta waxa gaadhi kara koox iyada oo aanay kamid ahayn waalidka ama ardayga qofka wayn ah hadii dugsigu aanu awoodin waalid ama arday, qof wayn ah, inuu ka qayb galiyo go'aanka. Markan oo kale, dugsigu waa inuu duwaan geliyaa markasta oo ay isku dayaan inay xaqiijiyaan ka qaybgelintooda.

Qiimaynta Waxbarashada Madaxa Banaan

Qaybtan soo socda ku celceliyaa qeexitaanada iyo shuruudaha qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan hoos 34 CFR § 300.502 iyo Shuruucda IV.B.

Qeexitaanada Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa Banaan

Qiimaynta waxbarashada madaxa banaan (IEE) macnaheedu waa qiimaynta in uu fuliyo imtixaan qaade takhasus u leh oo aan u shaqayn dugsiga ka masuulka ah waxbarashada ardayga.

Kharashka dadwaynaha macnaheedu waa laba mid uun in dugsigu wada bixiyo kharashka qiimaynta ama uu hubiyo in qiimaynta si kale loo siiyo iyada oo bilaa lacag ah waalidka ama ardayga qofka wayn ah.

Xuquuqda Qiimaynta Kharashka Shacabka

Waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga qofka wayn ah waxa uu xaq u leeyahay inuu helo IEE ardayga iyada oo dawladdu ka bixinayso hadii uu diido qiimaynta dugsiga.

Marka la dalbado IEE, dugsigu waa inuu siiyaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah, macluumaadka halka IEE laga heli karo iyo shuruudaha dugsiga ee ku munaasabka ah ee IEE.

Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu dalbado IEE ay dawladu ka bixiso, dugsigu waa inuu, iyada oo aanu dib u dhac aan loo baahneyn ku samaynin, xareeyaa cabashada nidaamka oo uu dalbadaa dhagaysiga lagu muujinayo in qiimayntu munaasab tahay, ama inuu xaqiijiyaa in IEE la bixiyo oo kharashka dawladu bixiso, iyada oo dugsigu muujiyo moojee in qiimaynta uu sameeyay waalidka ama ardaygu qofka wayn ahi ayna buuxinaynin shuruudaha LEA.

Hadii dugsigu uu xareeyo cabashada nidaamka oo uu dalbado dhagaysiga oo go'aanka ugu danbeeyaa uu noqdo qiimaynta dugsiga inay ku haboon tahay, waalidka ama ardayga qofka wayn ah waxa uu xaq u leeyahay IEE, laakiin kama bixinayso dawladu.

Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu dalbado IEE, dugsigu waxa uu dalban karaa sababta waalidka ama ardayga ay u diideen qiimaynta shacabka. Laakiin, sharaxa waalidka ama ardayga qofka wayn ah lama dalban karo, oo dugsiga si macquul ah dib uguma dhigi karo bixinta IEE ee kharashka dawladdu bixinayso ama ma dalban karo dhagaysiga dacwadda nidaamka si loo difaaco qiimaynta shacabka.

Waalidka ama ardayga qofka wayn ahi waxa uu xaq u leeyahay kaliya hal IEE oo dawladu ka bixiso kharashkeeda wakhti kasta oo dugsigu uu sameeyo qiimaynta taas oo waalidka ama ardayga qofka wayn ahi aanu ku qancin.

IEE kharashka lagu qabanayo ay dawladu bixiso waxa iska leh LEA, gebi geeda.

QIIMAYNTA AY WAALIDKU BILAABEEN

Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu qaato IEE oo ay dawladu ka bixiso kharashkeeda ama uu la wadaago dugsiga qiimaynta la heley ee dawladu ay bixisay kharashkeeda, natiijada qiimaynta:

1. Waa inuu eego dugsiga, wixii go'aan ah ee la gaadhay ee ku saabsan siinta FAPE ardayga taas oo ay shardi u tahay IEE in ay buuxiso shuruudaha dugsiga, iyo
2. Waxaa uu ugu soo bandhigi karaa dhinac kastaa cadayn ahaan dhagaysiga cabashada nidaamka ee ku saabsan ardaygaas.

DALABYADA QIIMAYNTA AY SAMEEYAAN SARAAKIISHA DHAGAYSIGA

Haddii sarkaalka dhagaysiga codsato IEE-da oo qayb ka ah dhagaysiga cabashada nidaamka, kharashka qiimaynta waa in uu noqdaa mid dawladdu bixiso.

SHURUUDAHA DUGSIGA

Haddii kharashka IEE-da lagu bixinayo kharashka dawladda, shardiga lagu helay qiimayntu, oo ay ku jirto goobta qiimaynta iyo takhasuska imtixaan qaadaha, waa in

ay la mid ahaataa shardiga dugsigu uu isticmaalo marka uu bilaabayo qiimaynta, ilaa xadka shardiyadani ay waafaqsanyihiin xuquuqda waalidka ama ardayga qofka wayn ah, uu u leeyahay IEE.

Marka laga tago shuruudaha lagu sharaxay kor, LEA ma soo saari karto shuruudo dheeraad ah ama jadwal-wakhtiyeed la xidhiidha helitaanka IEE oo ay dawladu bixinayso kharashkiisa.

Waalidka Maxkamaddu Magacawday (34 CFR § 300.519; Shuruucda IV.T.)

Dugsigu waa inuu xaqiijiyaa in xuquuqda ardayga la ilaaliyo marka:

1. Marka waalid loo xaddidi kari waayo arday ka hooseeya da'da qaangaadhnimada;
2. Dugsiga, kadib markii la sameeyay dadaal macquul ah, waxay waayeen waalidka ardayga ka yar da'da qaangaadhnimada;
3. Ardayda waxaa uu ku jiraa xarumaha daryeelka carruurta ee Gobolka sida ay dhigayaan sharciyada Gobolka Utah; ama
4. Ardayga waxaa weeye qof dhalinyar ah oo bilaa cid ah oo bilaa guri ah oo ka yar da'da qaangaadhnimada.

Masuuliyadaha dugsiga waxaa kamid ah u magacaabista shakhsiga sharciga inuu uu noqdo waalidka maxkamaddu magacawday ee ardayga ka yar da'da qaangaadhnimada. Tan waa inay kamid noqoto qaabka lagu ogaanayo hadii arday ka yar da'da qaangaadhnimada uu u baahan yahay waalidka ay magacawday maxkamaddu iyo in ardayga loo magacaabo waalidka ay magacawdo maxkamaddu.

Haddii ay dhacdo in ardaygu ku jiro xarumaha daryeelka carruurta ee Gobolka, waalidka ay magacawday maxkamaddu oo kale ayuu u magacaabi karaa xaakin si uu kormeer ugu sameeyo kiiska ardayga, taas oo ay shardi u tahay in waalidka ay magacawday maxkamaddu uu buuxyo shuruudaha.

Dugsigu waxa uu dooran karaa waalidka ay magacawday maxkamaddu si kasta oo uu ogol yahay sharciga Gobolku. Dugsigu waa inuu xaqiijiyo in qofka loo dooray waalidka ay magacawday maxkamaddu:

1. Aanu ahayn shaqaale USBE, dugsiga, ama hay'ad kale oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha;
2. Aanu lahayn dano shakhsi ahaaneed ama xirfadeed oo ka hor imanaya danta ardayga ee waalidka ay magacawday maxkamaddu uu metelayo; oo
3. uu leeyahay aqoonta iyo xirfadaha lagu xaqiijinayo bandhig wax ku ool ah oo ardayga ah.

Qofka sida kale ugu qalma in uu noqdo waalidka ay magacawday maxkamaddu uma shaqeeyo dugsiga kaliya maadaama oo qofka uu dugsigu siiyo gunada adeega uu qabanayo ee ah waalidka ay magacawday maxkamaddu.

Hadii ardayga ah qofka dhalinyarta ee aan cidna lahayn uu noqdo bilaa guri, shaqalaaha hoyga xaalada degdeg ah, hoyga kala guurka, barnaamijyada nolosha madaxa banaan, iyo barnaamijyada wacyi gelinta jidka ee habboon waxa loo aqoonsan karaa inay yihiin waalidka ay magacawday maxkamaddu oo kumeel gaadh ah, ilaa inta waalidka ay magacawdo maxkamadda loo magacaabi karo kaas oo buuxiya dhamaan shuruudaha.

Waalidka ay magacawday maxkamaddu waxa uu ku matali karaa ardayga dhamaan arrimaha la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarashada ardayga, iyo siinta FAPE ee ardayga.

USBE iyo shaqaalaha dugsigu waa inay sameeyaan dadaal macquul ah oo lagu xaqiijinayo magacaabista waalidka ay magacawdo maxkamaddu muddo aan ka badneyn 30 maalmood kadib marka uu dugsigu ogaado in ardaygu u baahan yahay waalidka ay magacawdo maxkamaddu.

Wareejinta Xuquuqda Waalidka da'da Qaangaadhnimada (34 CFR § 300.520; Shuruucda IV.U.)

Marka ardayga qaba laxaad la'aanta uu gaadho da'da qaangaadhnimada sida uu dhigayo sharciga Gobolka (sida, da'da 18) ee khuseeya dhamaan ardayda, marka laga tago ardayga qaba laxaad la'aanta ee la ogaaday in aanu lahayn wax qabad sida uu dhigayo sharciga Gobolku, ama ardayga laxaadka la' uu guursado ama uu ka baxo masuuliyadda waalidka:

1. Dugsigu waa inuu siiyaa wixii wargelin ah ee uu waajibinayo IDEA shakhsiga iyo waalidka;
2. Dhamaan xuquuqda kale ee waalidka uu siiyo IDEA waxa ay u wareegaan ardayga; iyo
3. Dhamaan xuquuqda waalidka uu siiyo IDEA waxa ay u wareegaan ardayga ku xidhan jeelka dadka waawayn ama caruurta ee Gobolka ama deegaanka; iyo
4. Marka gobolku uu wareejiyo xuquuqda, dugsigu waa inuu wargeliyaa shakhsiga iyo waalidka wareejinta xuquuqda mudo macquul ah gudaheed.

SIRTA MACLUUMAADKA

SIRTA MACLUUMAADKA (34 CFR § 300.610 – 300.626; SHURUUCDA IV.V.; R277-487)

Shaqaalaha USBE iyo dugsigu waxay qaadi doonaan talaabooyin haboon oo lagu xaqiijin doono ilaalinta sirta ee xogta, macluumaadka, iyo diiwaanada sheegeysa haybta shakhsi ahaaneed ee ay uruuriyeen ama ay hayaan shaqaalaha USBE iyo dugsiyada si waafaqsan Shuruucda Maamulka IDEA iyo Utah ee R277-487.

QEEXITAANADA SIRTA (34 CFR § 300.611; SHURUUCDA IV.V.2.)

Burburinta micnaheedu waa burburin muuqata ama ka saarida xogta waxyaabahii qofka lagu aqoonsan lahaa si xogta shakhsi ahaaneed aan qof loogu aqoonsan karin intaa kadib.

Diiwaanka waxbarashada micnaheedu waxa weeye nooca diiwaanka ku gedaaman qeexidda "diiwaanka waxbarashada" ee 34 CFR § 99, dhaqangelinta shuruucda Xeerka Xuquuqda iyo Sirta Waxbarashada Qoyska ee 1974, 20 USC §1232g (FERPA).

Wakaalada ka qaybgalaysa macnaheedu waxa weeye dugsi, wakaalad ama hay'ad kasta oo ururisa, haysa, ama isticmaasha xogta shakhsiga lagu aqoonsado, ama kaas oo xogta laga helay, sida ay dhigayso IDEA.

MACLUUMAADKA SHEEGAYA HAYBTA (34 CFR § 300.32; SHURUUCDA I.E.37.)

Macluumaadka sheegaya haybta shakhsi ahaaneed (PII) waxay ka dhigan tahay macluumaadka ay tahay in la ilaaliyo oo ay kamid yihiin:

1. Magaca ardayga, walaidka ardayga, ama xubinta kale ee qoyska;
2. Cinwaanka ardayga;
3. Aqoonsi shakhsi, sida lambarka sooshal sekeyuuritiga ardayga ama lambarka ardayga; ama
4. Liis ah astaamo shakhsi ama macluumaad kale oo suuragalin karta in lagu garto arday hubitaan macquul ah.

WARGELINTA WAALIDKA AMA ARDAYGA QOFKA WAYN AH (34 CFR § 300.612; SHURUUCDA IV.V.3-4.)

USBE iyo dugsigu waa inay wargelin wanaagsan siiyaan si ay waalidka ama ardayga qofka weyn ah si buuxda u wargeliyaan, oo waxaa kamid ah:

1. Faahfaahinta xadiga kaas oo lagu bixiyay ogaysiiska luuqadaha hooyo ee kooxaha mujtamaca kala duwan ee gudaha Gobolka;
2. Faahfaahinta PII ardayda laga hayo, nooca xogta la baadi goobayo, qaababka USBE qorshaynayso in ay u adeegsato xog ururinta (iyadoo lagu darayo ilaha xogta laga soo ururiyay), iyo isticmaalka lagu samayn doono xogta;
3. Soo koobid ah hanaanka iyo siyaasada ee ay tahay in dugsiyadu raacaan ee ku saabsan kaydinta, u muujinta dhinacyo saddexaad, haynta, iyo burburinta PII; iyo,
4. Sharaxa dhamaan xuquuqda waalidka iyo ardayga ee ku saabsan macluumaadkan, oo ay ku jiraan xuquuqda FERPA.

Kahor inta aan la qaban hawl weyn oo ah aqoonsiga, goobta, ama qiimaynta, wargelinta waa in lagu baahiyaa ama lagu bayaamiyaa wargeyska, ama saxaafada kale, ama labadaba, ee wareega oo gaadhsiin kara waalidka ama ardayga qofka wayn ah Gobolka oo dhan iyo dugsiyada hawsha.

Xuquuqda Gelitaanka (34 CFR § 300.613; Shuruucda IV.V.5.)

Dugsi kastaa waa inuu u ogolaadaan waalidka ama ardayga qofka wayn ah inay baadhaan oo ay eegaan wixii duwaanada waxbarashada ah ee la xidhiidha ardaygooda ama naftooda ee uu uruuriyay, hayo ama uu isticmaalo dugsigu. Dugsigu waa inuu u hogaansamaa dalabka isaga oo aan sameyneyn dib u dhac ah aan daruuri ahayn iyo kahor inta aan la samaynin wax kulan ah oo IEP ah, ama wixii dhagaysi ama madasha xalinta, oo waa inayna sinaba uga badan 45 maalmood kadib marka dalabka la diro.

Xuquuqda baadhitaanka iyo naqdinta duwaanada waxbarashada ee hoos yimaada qabtan waxaa kamid ah:

1. Xuquuqda jawaabta ka imanaysa dugsiga ee ku saabsan codsiyadaada macquulka ah ee sharaxaada iyo turjumaada diiwaanada;
2. Xuquuqda dalabka in dugsigu uu bixiyo nuqulo duwaanada ah oo ay ku jiraan macluumaadka hadii la bixin waayo nuquladan waxay ka baajin doontaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah inuu xuquuqdiisa helo ah baadhitaanka iyo naqdinta duwaanada; iyo
3. Xuquuqda ah in laga dalbado wakiilka waalidka ama ardayga qofka wayn ah inuu baadho oo uu naqdiyo duwaanada.

Dugsiga waxa uu qiyaasi karaa in waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu awood u leeyahay inuu baadho oo uu naqdiyo duwaanada la xidhiidha ardayga iyada oo dugsiga loo sheegey moojee in waalidku aanu awood u lahayn sida uu dhigayo sharciga Gobolkaa ee munaasabka ah ee maamula arrintan koriyaha, kala tagga, iyo furniinka.

DUWAANKA GELITAANKA (34 CFR § 300.614; SHURUUCDA IV.V.6.)

Dugsi kasta waa inuu hayo duwaanada dhinacyada si ay u galaan duwaanada waxbarashada ee la uruuriyay, ay hayaan, ama ay adeegsadeen IDEA iyo Shuruucda (marka laga tago gelitaanka waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo shaqaalaha loo ogol yahay ee dugsiga), waxaa kamid ah magaca dhinaca, taariikhda gelitaanka la bixiyay, iyo ujeedada dhinaca loogu ogolaaday inuu u isticmaalo duwaanada.

DUWAANADA WIXII KA BADAN HAL ARDAY (34 CFR § 300.615; SHURUUCDA IV.V.7.)

Hadii wax duwaanada waxbarashada ay ku jiraan macluumaadka wax ka badan hal arday, waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah waxa uu xaq u leeyahay inuu baadho oo uu naqdiyo kaliya macluumaadka la xidhiidha ardaygooda ama naftooda ama in loo sheego macluumaadkaas gaarka ah.

LIISKA NOOCYADA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA (34 CFR § 300.616; SHURUUCDA IV.V.8.)

Marka la dalbado, dugsigu waa in uu siiyaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah liis ah noocyada iyo goobaha diiwaanka waxbarashada uu soo ururiyey, hayo, ama ay isticmaaleen dugsigu.

KHARASHKA (34 CFR § 300.617; SHURUUCDA IV.V.9.)

Shaqaalaha USBE iyo dugsi kasta waxa uu qaadi karaa kharashaadka nuqulada duwaanada ee loo sameeyay waalidka ama ardayga qofka wayn ah sida ay dhigayso IDEA hadii kharashka aanu kahor istaagaynin waalidka ama ardayga qofka weyn ah inuu helo xuquuqdiisa baadhitaanka iyo naqdinta duwaanadan.

Shaqaalaha USBE iyo dugsigu ma qaadi karaan kharash baadhitaanka ama soo saaritaanka macluumaadka sida ay dhigayso IDEA.

WAX KAGA BEDDELKA DIIWAANADA CODSIGA WAALIDKA (34 CFR § 300.618; SHURUUCDA IV.V.10.)

Waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee u arka in macluumaadka ku jira duwaanada waxbarashada ee la uruuriyay, la hayo ama lagu isticmaalo IDEA ama Shuruucda ayna saxnayn ama ay ku jiraan macluumaad majaro habaabin ama xad gudub u ah sirta ama xuquuqda kale ee ardayga waxa uu ka dalban karaa dugsiga haya macluumaadka inuu wax ka bedelo macluumaadka.

Dugsigu waa in uu go'aansadaa haddii uu bedelayo xogta iyadoo waafaqsan codsiga mudo macquula gudaheed oo ka bilaabmaya wakhtiga helitaanka codsiga.

Hadii dugsigu uu go'aamiyo inuu diido wax ka bedelka macluumaadka si waafaqsan dalabka, waa inuu u sheegaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah diidmada oo uu u sheegaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah xuquuqda dhagaysiga ee arrinka.

Fursadaha Dhagaysiga (34 CFR § 300.619; Shuruucda IV.V.11.)

Dugsigu waa inuu, marka laga dalbado, bixiyaa fursad dhageysi si loo diro xogta ku jirta diiwaanka waxbarashada si loo hubiyo in aanay khaldanayn, marin habaabis ahayn, ama si kale xadgudub ugu ahayn sirta ama xuquuqda kale ee ardayga. Dhagaysigan maaha cabashada nidaamka IDEA ama dalabka dhagaysiga.

Natiijada Dhagaysiga (34 CFR § 300.620; Shuruucda IV.V.12.)

Haddii, dhageysiga kadib, dugsiga uu go’aansado in xogtu ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabis ah, ama si kale xadgudub ugu ah gaar sirta ama xuquuqaha kale ee ardayga, waa in uu bedelaa xogtaasi si taas waafaqsan oo uu sidaas ugu wargeliyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyada oo qoraal ah.

Hadii, dhagaysiga kadib, dugsigu uu go'aamiyo in macluumaadka aanu khaldanayn, majaro habaabin samaynaynin ama si kale xad gudub ugu ahayn sirta ama xuquuqda kale ee ardayga, waa in uu u sheegaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah xuquuqda ah inuu duwaanka uu hayo ee ardayga geliyo bayaan uu kaga faalloonayo macluumaadka ama sheegitaanka sababaha uu uga dooday go'aanka dugsiga.

Wixii sharax ah ee la gelinayo duwaanada ardayda sida ay dhigayso qaybtan waa in:

1. Lagu hayaa dugsiga iyada oo qayb ka ah duwaanada ardayga ilaa inta duwaanka ama qaybta la isku khilaafsan yahay uu hayo dugsigu; iyo
2. Hadii duwaanada ardayga ama qaybta la isku khilaafsan yahay uu bixiyo dugsigu oo uu siiyo cid kale, sharaxa waa in sidoo kale loo sheegaa dhinaca.

Nidaamyada Dhagaysiga (34 CFR § 300.621; Shuruucda IV.V.13.).

Dhagaysiga lagu durayo duwaanada waxbarashada waa inay waafaqsanaadaan habraacyada sida uu dhigayo 34 CFR § 99.22 sida lagu sharaxay hoos. Ugu yaraan, nidaamka dhagaysiga dugsgiu waa inuu u hogaansan yahay shuruudaha soo socda:

1. Dugsigu waa inuu ku qabtaa dhagaysi muddo macquul ah gudaheed kadib marka dugsigu uu helo dalabka, oo waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah waa in lasiiyo wargelinta taariikhda, goobta, iyo saacada wakhti macquul ah kahor dhagaysiga.

2. Dhagaysiga waxaa samayn kara shakhsi kasta, oo waxaa kamid ah sarkaalka dugsiga, aan lahayn dan gaar ah oo natiijada dhagaysiga ah.
3. Waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah waa in la siiyo fursad buuxda oo cadaalad ah oo uu kusoo bandhigo cadaymaha la xidhiidha mushkilada ka timaada oo waxaa caawin kara ama usoo bandhigi kara shakhsiyaad waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, ay doortaan iyaga oo iska bixinaya kharashkooga, oo waxaa kamid ah looyarka.
4. Dugsigu waa inuu ku gaadhaa go'aanka mudo macquul ah gudaheed iyada oo qoraal ah kadib marka la soo gunaanado dhagaysiga.
5. Go'aanka dugsiga waa in uu ku saleysnaadaa keliya cadeynta lagu soo bandhigay dhageysiga oo waa in ay ku jirtaa soo koobid cadeynta ah iyo sababta go'aanka.

OGOLAANSHAHA BIXINTA MACLUUMAADKA SHEEGAYA HAYBTA SHAKHSI AHAANEED (34 CFR § 300.622; SHURUUCDA IV.V.14.)

Makra laga tago bixinta lagaga hadlay gudbinta iyo tallaabada ciidanka bilayska ah iyo maamullada garsoorka, ee ogolaanshaha waalidka aanu waajibineyn 34 CFR § 99, waalidka ama ardayga qofka wayn ah ogolaanshihiisa waa in laga qaadaa kahor inta aanu PII aan:

1. La siinin cidna aan ahayn saraakiisha ku jirta hay'ada ka qayb galaya uruurinta ama isticmaalka macluumaadka sida uu dhigayo IDEA ama Shuruucda, ama
2. Loo isticmaalin ujeedooyin aan ahayn buuxinta shuruudaha ee IDEA ama Shuruucda.

Dugsiga waxaa dhici karta in aanu siin macluumaadka duwaanada waxbarashada hay'adaha ka qayb galaya iyada oo aanay bixin ogolaanshe waalid ama arday qof weyn ah iyada oo ay ogol yihiin moojee samaynta sidaa 34 CFR §§ 99.31 iyo 99.34 (FERPA):

1. 34 CFR § 99.31 waxa uu u ogolaanayaa dugsiga inuu ka bixiyo PII duwaanada waxbarashada ee ardayga iyada oo aan la haynin ogolaanshe qoran oo waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah hadii bixitaanku uu yahay:
    a. Mid loo sameynayo saraakiisha kale ee dugsiga, oo ay ku jiraan macalimiinta dugsiga ee uu go'aamiyay dugsigu inay leeyihiin dan waxbarasho oo sharci ah.
    b. Mid loo samaynayo saraakiisha dugsi kale ama goob dugsi oo ardaygu doonayo ama uu qorshaynayo inuu ku biiro, taas oo hoos tagaysa shuruudaha lagu sheegay 34 CFR § 99.34, hoos.

2. 34 CFR § 99.34 waxa uu waajibinayaa in dugsiga wareejinaya duwaanada waxbarashada ardayga si waafaqsan 34 CFR § 99.34 ee sare ay tahay in uu isku day macquul ah sameeyaan oo ay ku wargelinayaan waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah ku wareejinta duwaanada cinwaanka ugu danbeeyay ee la garanayo ee waalidka ama ardayga qofka wayn ah, marka laga tago in dugsiga ayna ku waajib ahayn in uu bixiyo wargelin kale oo wareejinta duwaanada ah marka:
    a. Wareejinta uu ka bilaabo waalidka ama ardayga qofka wayn ah dugsiga diraya.
    b. Dugsigu uu ku daro wargelintiisa sanadkii ee dhawritaanada habraaceed, in ay tahay siyaasada dugsiga inuu u drio duwaanada waxbarashada marka la dalbado dugsiga ardaygu uu doonayo inuu ku biiro.
    c. Dugsiga wareejinaya duwaanada waa inuu hayaa nuqul duwaanada ah mudo sadex sano ah kadib marka uu wareejiyo.

Dugsiga loo dirayo PII ee ka heleya hay'ad waxbarasho oo kale ama macad waxay sii siin kartaa macluumaadka iyada oo matalaysa dugsiga iyada oo aan ogolaanshe hore ka helin waalid ama ardayga qofka wayn ah hadii shuruudaha 34 CFR §§ 99.31 iyo 99.34 ee hore lagu sheegey la buuxiyay, iyo hadii hay'ada waxbarashada ay u sheegto cida bixinta la siinayo shuruudahan.

Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ah uu diido inuu ogolaado siinta PII dhinac saddexaad, kadib dhinacaas waxa uu doonan karaa habraacyada sharciga iyada oo dedaal loogu jiro si loo helo macluumaadka la doonayo.

Sida lagu ogolaaday 34 CFR § 99.31 (FERPA), Utah LEAs waxaa kamid ah wargelinta dhawritaanada habraaceed ee sanadkii in ay tahay siyaasadooda inay u diraan duwaanada waxbarashada ee ardayga qaba laxaad la'aanta iyada oo aan la haysan ogolaanshaha iyo wargelinta waalidka ama ardayga qofka weyn ah saraakiisha dugsi taas oo ardaygu uu doonayo ama uu qorshaynayo inuu galo.

DHAWRITAANADA (34 CFR § 300.623; SHURUUCDA IV.V.15.)

Dugsi kastaa waa inuu ilaaliyaa sirta PII marka uu uruurinayo, kaydinayo, bixinayo, iyo marka uu burburinayo.

Hal masuul oo dugsi kasta ah ayaa qaadi doona masuuliyada xaqiijinta sirta wixii PII ah.

Dhamaan dadka uruurinaya ama isticmaalaya PII waa inay qaataan tobobar ama tilmaamaha ku saabsan siyaasadaha iyo habraacyada Gobolka ee qabtan iyo 34 CFR § 99.

Dugsi kastaa waa in uu u hayaa, baadhitaanka dadwaynaha awgii, liiska hadda ee magacyada iyo boosaska shaqaalaha ku sugan dugsiga kuwaas oo galaangal u yeelan kara PII ga ardayda laxaadka la'.

Burburinta Macluumaadk (34 CFR § 300.624; Shuruucda IV.V.16.)

Dugsigu waa inuu u sheegaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah marka uu uruurinayo PII, haynayo, ama isticmaalayo sida uu dhigayo IDEA oo Shuruucda aan loo baahnayn si loo siiyo adeegyada waxbarashada ardayga.

Macluumaadka wixii intaa ka danbeeya aan loo baahnayn waa in la burburiyaa marka uu dalbado waalidka ama ardayga qofka wayn ahi. Si kastaba ha ahaatee, diiwaanka joogtada ah ee magaca, cinwaanka, lambarka telefoonka, buundooyinka ardayga, diiwaanka soo xaadirka, xiisadaha uu soo xaadiray, heerka fasallada uu dhamaysatay, iyo sanadka uu dhameeyay ardagu waxaa laga yaabaa in la hayo waligoodba.

Duwaanada arday kasta waxaa loo arki karaa "in aan loogu baahnayn wixii intaa ka danbeeya si loogu siiyo adeegyada waxbarashada" oo waxaa la burburin karaa sadex sano kadib marka uu ardaygu qalin jabiyo ama sadex sano kadib marka ardaygu uu noqdo 22 jir sida uu dhigayo IDEA. Medicaid waxa uu u baahan yahay in duwaanada la hayo ugu yaraan shan sano kadib marka la bixiyo adeegyada.

Xuquuqda Ardayga (34 CFR § 300.625; Shuruucda IV.V.17.)

Xuquuqda sirta ee la siiyay waalidka waxaa loo wareejinayaa ardayga marka uu gaadho 18 jir, taas oo ay shardi u tahay in ardayga aan loo arkaynin mid aan go'aan gaadhi karin taas oo lagu cadeeyay amar maxkamadeed ama ardayga uu guursaday ama uu sharciyan madax banaanaaday.

Shuruucda FERPA ee 34 CFR § 99.5(a) waxay dhigayaan, xuquuqda waalidka ee ku saabsan duwaanada waxbarashadda in loo wareejiyo ardayga marka uu 18 jir gaadho, taas oo ay shardi u tahay in aanu ardaygu maskixiyan aanu laxaad la'ayn taas oo lagu cadeeyay amar maxkamadeed ama ardayga aanu guursan ama aanu sharcigan madax banaanaanin.

Maadaama xuquuqda la siiyey waalidiinta sida uu dhigayo IDEA loo wareejinayo ardayga marka uu gaadho 18 jir, iyada oo ay shardi u tahay in ardayga aan loo arkaynin mid aan go'aan gaadhi karin taas oo lagu cadeeyay amar maxkamadeed ama ardayga uu guursaday ama uu sharciyan madax banaanaaday, xuquuqda ku saabsan duwaanada waxbarashada sidoo kale waxaa loo wareejinayaa ardayga.

Laakiin, dugsigu waa inuu siiyaa wixii wargelin ah ee ay waajibinayso Qaybta 615 ee IDEA ardayga iyo waalidka.

Ardayda Qabta Laxaad la'Aanta ee ay Waalidkood Geliyeen Dugsiyo Gaar ah Marka FAPE ay soo Saarto (34 CFR § 300.148; Shuruucda VI.C.)

Nidaamka Guud ee Meelaynta Dugsiga Gaarka ah Marka FAPE Lasoo Saaro

IDEA kuma waajibinayso dugsi ama Dugsiyada Utah ee Dhagoolka iyo Indhoolka (USDB) in ay bixiyaan lacagta waxbarashada, oo waxaa ku jira waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, ee ardayga qaba laxaad la'aanta ee ku jira xarun ama dugsi gaar ah hadii dugsiga ama USDB ay u diyaariyey FAPE ardayga iyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah doortay in lagu meeleeyo ardayga xarun ama dugsi gaar ah. Laakiin, dugsiga ama USDB waa in lagu daraa in ardayga ku jira shacabka ardayga gaarka ah ee baahiyahooda looga jawaabay qaab waafaqsan sida uu dhigayo Sharciga VI.B.

Ardayda Laxaadka La' ee Ay Geliyaan Waalidkood Dugsiga Gaarka ah Marka FAPE ayna Soo Saarin (Meelayn Hal Dhinac)

Is af garan waaga waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsiga ama USDB ee ku saabsan helitaanka barnaamijka ku haboon ardayga, iyo su'aasha guditaanka dhaqaale, waa kuwo hoos imanaya habraacyada cabashada Gobolka iyo cabashada nidaamka ee Sharciga IV.E.–U.

Magdhowga Dhaqaale ee Meelaynta Dugsiga Gaarka ah

Hadii waalidka ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga qofka wayn ah, ee hore u qaadan jiray waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha oo hoos yimaada maamulka dugsiga ama USDB, uu ku daro ardayga waxbarashada dugsiga kahor, dugsiga hoose, ama dugsiga sare oo gaar ah iyada oo aanu ogolaanshe ka helin ama aanu soo gudbin dugsiga ama USDB, maxkamada ama sarkaalka dhagaysiga waxa uu dugsiga ama USDB ka dalban karaa inuu u gudo waalidka ama ardayga qofka wayn ah kharashka qoraalka hadii maxkamadu ama sarkaalka dhagaysiga uu ogaado in dugsiga ama USDB ayna u diyaarin FAPE ardayga wakhtigii loo baahnaa kahor inta aan la qorin iyo meelaynta dugsiga gaarka ah inuu munaasab yahay. Meelaynta waalidka waxaa ku tilmaami kara mid munaasab ah sarkaalka dhagaysiga ama maxkamada xataa hadii aanu buuxin shuruudaha Gobolka ee dalbashada waxbarashada ay bixiyaan USDB iyo dugsiyadu.

XADIDIDA MAGDHOWGA DHAQAALE

Qiimaha magdhowga sida lagu faahfaahiyay tuduca sare waa la yarayn karaa ama la diidi karaa hadii:

1. Kulanka Kooxda IEP ee ugu danbeeyay ee waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu xaadiray kahor inta aan ardayga laga saarin dugsiga dadweynaha, waalidka ama ardayga qofka wayn ahi aanay u sheegin Kooxda IEP inay diideen meelaynta uu soo jeediyey dugsiga ama USDB si loosiiyo FAPE ardayga, oo waxaa kamid ah sheegitaanka walaacyada iyo rabitaankooda ku darida ardayga ee dugsiga gaarka ah oo kharashkiisa ay bixiyaan dawladdu; ama
2. Ugu yaraan toban maalmood oo shaqo (waxaa kamid ah wixii maalmo ciidaha ah oo dhaca maalmaha shaqada) kahor inta aan ardayga laga saarin dugsiga, waalidka ama ardayga qofka wayn ah aanay ku siinin wargelin qoraal ah dugsiga ama USDB macluumaadka kor lagu sheegey;
3. Kahor inta aan waalidku ama ardayga, qofka wayn ah, aanu ardayga ka saarain dugsiga shacabka, dugsiga ama USDB ay ugu sheegeen waalidka ama ardayga qofka wayn ah, iyaga oo u maraya shuruudaha wargelinta qoraalka ah ee hore inay doonayaan qiimaynta ardayga (waxaa kamid ah bayaanka ujeedada qiimaynta ee ku haboonaa ee macquulka ahaa), laakiin waalidka ama ardayga qofka wayn ah ardayga aanay u diyaarin ardayga qiimaynta; ama
4. Maxkamadu ay ogaato in ayna macquul ahayn talaabooyinka ay qaadeen waalidka ama ardayga qofka wayn ah.

Iyada oo ay jiraan shuruudaha waalidka ama ardayga qofka wayn ah marka uu siiyo wargelinta dugsiga ama USDB kahor inta aan ardayga laga saarin, kharashka la gudayo:

1. Waa inayna yaraynin ama meesha ka saarin bixin la'aanta bixinta wargelinta awgeed hadii:
    a. Dugsigu uu ka baajiyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah bixinta wargelinta;
    b. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah aanu helin wargelin qoraal ah oo hore oo ah masuuliyadooda bixinta wargelinta lagu sheegey kor; ama
    c. U hogaansanka shuruudaha wargelinta ee sare uu keenayo waxyeelo jidh oo ardayga ah; oo
2. Ay dhici karto, iyada oo lagu salaynayo qiimeynta maxkamada ama sarkaalka dhagaysiga, in aan la yaraynin ama diidin maadaama oo aan la bixin wargelintan hadii:

a. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah aanu aqoon lahayn ama aanu qori karin Ingiriisiga; ama
b. U hogaansanka Xadidaada sare ee shuruudaha Gudida ay u badan tahay inuu keeno waxyeelo dareen oo ardayga ah.

FOOMAMKA QAABKA (34 CFR § 300.509; SHURUUCDA IV.I.)

Shaqaalaha USBE waxay sameeyeen foomam qaab si uu waalidka ama ardayga qofka weyn ah uga caawiyo buuxinta cabashada Gobolka, cabashada dhagaysiga dacwadda nidaamka, iyo dalabka dhexdhexaadinta. Foomamkan waxaa laga heli karaa websaytka USBE: https://www.schools.utah.gov/specialeducation/programs/studentparentrights

Dhinacyada ku waajib maaha foomamka qaabka USBE inay isticmaalaan. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah, hay'adaha shacabka, iyo dhinacyada kale waxay isticmaali karaan foomka qaabka Gobolka ee munaasabka ah ama foom kale ama waraaqo kale, ilaa inta foomka ama waraaqaha la isticmaalayaa ay buuxinayaan, sida loogu arko munaasab, shuruudaha macluumaadka ee buuxinta cabashada nidaamka ama shuruudaha buuxinta cabashada Gobolka.

NIDAAMKA CABASHADA GOBOLKA (34 CFR §300.151–153; UCA 53E-7-208; SHURUUCDA IV.E.).

NIDAAMKA CABASHADA GOBOLKA EE GUUD

USBE waxay qaadatay nidaamyada xalinta wixii cabasho Gobolka ah ee hoos yimaada IDEA, oo waxaa kamid ah cabashada ay xaraysay hay'ada ama shakhsiga ee gobolka kale ka yimid.

1. Cabashada waa in loo xareeyaa Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah ee USBE iyada oo gacanta looga gaynayo, loogu dirayo Boosta Maraykanka, ama faakis ahaan, oo waxaa la raacinayaa magaca degmo dugsiga, dugsiga gaarka ah, ama hay'ada shacabka ee kale ee Gobolka ee siinaysa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ardayga qaba laxaad la'aanta ("dugsiga ama hay'ada shacabka ee kale") ee xad gudubku uu ka dhacay.
2. Dhinaca xaraynaya cabashada waa inuu sidoo kale nuqul u diyaa dugsiga ama hay'ada shacabka ee kale.
3. Hadii cida cabanaysaa ay ku xarayn kari waydo qoraal, waa inay kala xidhiidhaa dugsiga ama hay'ada shacabka ee kale ama Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah wixii kaalmo ah.
4. Marka uu cabashada Gobolka uu helo dugsiga ama hay'ada shacabka ee kale ama Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah, dhinaca heley waxa uu wargelin doonaa hay'ada kale hal maalin oo shaqo gudaheed, si loo xaqiijiyo isku duba ridka nidaamka iyo nuqulada ay heleen labadaba.
5. Mudada cabashada Gobolku waxay u bilaabmaysaa marka labada dhinacba ay helaan nuqulada.
    a. Wixii cabasho Gobolka ah ee la gudbiyo maalmaha fasaxa todobaadkii, maalmaha ciidaha, ama maalmaha kale ee aan shaqo ahayn waxaa laga shaqayn doonaa oo loo arkaa in la heley maalinta shaqo ee xigta.
    b. Wixii cabasho Gobolka ah ee la helo wixii ka danbeeya 5:00 galabnimo saacada mountianee maalinta shaqo waxaa laga shaqayn doonaa oo loo arkaa in la heley maalinta shaqo ee xigta.
6. Hadii cabashada Gobolka ay xareeyaan hay'ada ama shakhsi aan ahayn waalidka ama ardayga qofka wayn ah oo matalaya naftiisa, ogolaanshaha waalidka ama ardayga qofka wayn ah waa in la helaa kahor inta aan USBE ayna siin wixii macluumaadka sheegaya haybta qofka ee ku saabsan ardayga dacwad gudbiyaha qofka aan waalidka ahayn ama ardayga aan qofka wayn ahayn iyada oo qayb ka ah go'aanka cabashada Gobolka. Ogolaanshaha waa

inuu noqdaa qoraal, taariikh leeyahay, oo ay saxeexaan waalidka ama ardayga qofka wayn ahi. 34 CFR §§ 99.30 iyo 300.622.

a. Hadii ay macquul tahay, PII iyo macluumaadka kale ee la xidhiidha ardayga waa in la tafatiraa kahor inta aan go'aan loo soo saarin cida cabanaysa ee aan ahayn waalidka ama ardaya qofka wayn ah iyada oo USBE ay heshay moojee ogolaanshe qoraal ah oo ay ku wadaagayso macluumaadka noocan ah sida dhigayaan Shuruucdu.
b. Cabashada Gobolka darteed xalinta waxay u badan tahay inuu ku jiro PII-ka ardayga, oo waxaa macquul ah inayna suurto gal ahayn in go'aanka cabashada Gobolka ee USBE in la siiyo cawde aan ahayn waalidka hadii USBE ayna helin ogolaanshaha waalidka ee bixinta macluumaadka noocaas ah. USBE waxay u go'aamin doontaa arrintan kiis-kiis laakiin kama reebi doonto wixii macluumaadka ah ee aan sheegayn haybta shakhsi ahaaneed ee arrinta la xidhiidha ee ku saabsan natiijada xalinta cabashada Gobolka ee USBE.
c. Xataa hadii USBE ayna soo saari karin go'aan qoraal ah oo cabashada ah maadaama oo ay leeyihiin macluumaadka haybta shakhsi ahaaneed ee dabiiciga ah, USBE weli waa inay xaqiijisaa in ay xaliso cabashada Gobolka, oo ay u soo saarto go'aan qoraal ah waalidka ardayga laga hadlayo ah ama ardayga qofka wayn ah oo ka jawaabaysa eed kasta oo ku jirta cabashada Gobolka, oo ay xaqiijisaa dhaqangelinta wakhtiga ku habboon oo ah go'aankeeda qoraalka ah, waxaa kamid ah, hadii ay munaasab tahay, talaabooyinka sixitaanka ee lagu gaadhayo u hogaansan iyo tallaabooyinka wax lagaga beddelayo diidmada adeegyada ee munaaasabka ah. 34 CFR §§ 300.152(b)(2) iyo 300.151(b).

Xaraynta Cabashada Gobolka (34 CFR § 300.153; Shuruucda IV.E.)

Cabashada Gobolka waa inay kamid tahay waxyaabaha soo socda:

1. Bayaanka in dugsiga ama hay'ada shacabka ee kale ay ku xad gudubtay shuruudaha IDEA iyo Shuruucda;
2. Xogta bayaanku uu ku salaysan yahay;
3. Saxeexa iyo macluumaadka xidhiidhka ee cawdaha;
4. Hadii xad gudubka la sheegey uu ku aadan yahay arday gaar ah:
    a. Magaca iyo cinwaanka guriga ee ardayga;
    b. Magaca dugsiga ardaygu uu dhigto;

c. Marka la eego kiiska ardayga bilaa guriga ah, macluumaadka xidhiidhka ee ardayga ee la heli karo iyo magaca dugsiga uu ardaygu uu dhigto;
d. Faahfaahin nooca dhibaatada ardayga, ooy ku jirto xaqiiqooyin la xidhiidha dhibaatada; iyo
e. Xalka lagu talinayo ee mushkilada ilaa inta la og yahay ee uu heli karo dhinaca wakhtiga cabashada la qaadayo, sida lagu sheegey Sharciga IV.E.2.

Cabashada Gobolka waa inay sheegeysaa xad gudub dhacay wax aan ka badnayn hal sano kahor taariikhda cabashada Gobolka la heley.

Ma jiraan wax kamid ah nidaamka cabashada Gobolka oo xaddida awooda dugsiga ama hay'ada shacabka ay isku dayaan inay ula xaliyaan xad gudubka la sheegey si toos ah cawdaha; laakiin, USBE waxay sii wadi doontaa inay ka duusho cabashada Gobolka ee la gudbiyay ilaa inta warbixin lasoo saarayo ama cabashada laga noqonayo.

USBE waxay meesha ka saari kartaa gudbinta sheeganaysa inay tahay cabashada Gobolka ee ayna ku jirin dhammaan macluumaadka loo baahan yahay ee sare (Sharciga IV.3.a-d.). Hadii ay dhacdo in USBE ay meesha ka saarto gudbinta sheeganaysa inay tahay cabashada Gobolka, USBE waxay wargelin doontaa cawdaha, LEA ama hay'adaha kale ee shacabka, iyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah (hadii aanu ahayn cida cabanaysa iyo macluumaadka xidhiidhka la heli karo) ogaysiis ahaan shan maalmood oo shaqo gudahood oo ka bilaabmaya marka la helo soo gudbinta. Ogaysiisku waxaa noqon doontaa qoraal oo waxaa lagu soo diri doonaa Boosta Maraykanka. Ogaysiiska qoraalka ah waxay si gaar ah u sheegi doontaa macluumaadka loo baahan yahay ee maqan waxana ku jiri doona bayaan ah in ogaysiiska qoraalka ahi aanu diidaynin in cawduhu uu mustaqbalka uu gudbiyo cabashada Gobolka ee buuxisa shuruudaha Qaybta B ee IDEA ama Shuruucdan.

In ayna jirin xal lagu taliyo uma noqonayso sabab USBE ay meesha uga saarto cabashada Gobolka ee buuxisa shuruudaha lagu sheegey Shuruucdan.

NIDAAMKA CABASHADA GOBOLKA EE UGU YAR (34 CFR § 300.152; SHURUUCDA IV.E.)

MUDADA WAKHTIGA IYO INTA AY LE'EG TAHAY; NIDAAMKA UGU YAR; DHAQAN GELINTA

Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah waa inay ku xaliyaan cabashada Gobolka 60 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhda marka USBE iyo

dugsiga ama hay'ada kale ee shacabku ay hesho nuqulada iyada oo xaalado gaar ah ay jiraan moojee. Hadii mudo dheeraad ah loo baahan yahay, cawdaha iyo dugsiga ama hay'ada shacabka waxaa wargelin doona, iyada oo qoraal ah, qaybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee USBE. Mudadaas dhaxdeeda, Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah waa inuu:

1. Qabtaa baadhitaan madax banaan oo goobta ah, hadii Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaar ah ay ogaato in baadhitaanka noocan ahi uu daruuri yahay.
2. Siiyo cawdaha fursad uu ku gudbinayo wixii macluumaad dheeraad ah, iyada oo afka ah ama qoraal ah, ee ku saabsan eedaha ku jira cabashada Gobolka.
3. In la siiyo dugsiga ama hay'ada shacabka ee kale fursad ay kaga jawaabto cabashada Gobolka, oo waxaa kamid ah, ugu yaraan:
    a. Iyada oo lagu salaynayo qiimeynta hay'adda, inay ku taliso xalinta cabashada Gobolka; iyo
    b. Fursad waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee xareeyey cabashada iyo hay'ada inay si iskeed ah uga qaybqaadato cid dhaxdhexaadin (Shuruucda IV.H).
4. Inay naqdiyaan dhamaan macluumaadka ku saabsan arrinta iyo in la gaadho go'aano hadii dugsiga ama hay'ada kale ee shacabku ay ku xad gudubtay shuruudaha IDEA ama Shuruucda.
5. Inay u soo saarto go'aan qoraal ah cawdaha iyo, waalidka ama ardayga qofka wayn ah (hadii aanu ahayn cawdaha oo macluumaadka xidhiidhkana la hayo), iyada oo nuqul loo dirayo maamulaha LEA ee waxbarashada gaarka ah iyo kormeeraha guud ee degmo dugsiga ama maamulka dugsiga madaxa banaan, kaas oo ka jawaabaya eed kasta oo ku jirta cabashoda oo ka kooban:
    a. Go'aanada ah xaqiiqooyinka iyo gunaanadada; iyo
    b. Sababaha go'aanka ugu danbeeya ee USBE.
6. Ruqsada kordhinta mudada sida uu dhigayo Sharciga IV.E.6. kaliya hadii:
    a. Xaalado gaar ah ay jiraan oo la xidhiidha cabashada Gobolka gaar ah taas oo lagu sheego kiis-kiis; ama
    b. Waalidka, ardayga qofka wayn ah, ama cawdaha (hadii aanu waalidka ahayn) iyo dugsiga ama hay'ada ku shuqul leh ay ogolaadaan in la kordhiyo mudada laga qaybqaadanayo dhexdhexaadinta, ama in laga qaybqaato qaab kale oo lagu xalinayo muranka oo laga heli karo Gobolka.
        i. Cawdayaasha aan waalidka ahayn ama ardayga qofka wayn ma dalban karaan dhex dhexaadin.

c. USBE waxay ogolaanaysaa kordhinta wakhtiga oo iyada oo qoraal ah ayay u diraysaa cawdaha (hadii waalidka aanay ahayn), waalidka ama ardayga qofka wayn ah, iyo LEA ama hay'adaha kale ee shacabka ee ku lug leh.

Kordhinta waxaa la samayn doonaa taariikh gaar ah oo waxaa lagu duwaan gelin doonaa go'aanka cabashada Gobolka (hadii ay jirto).

7. La eegi doonaa nidaamyada dhaqalgalka waxku oolka ah ee go'aanka ugu danbeeya ee USBA, hadii loo baahdo, oo waxaa kamid ah hawlaha kaalmada farsameed, gorgortanka, iyo talaabooyinka sixitaanka ee lagu gaadhayo u hogaansanka.

GO'AANKA KAMA DANBAYSTA AH

Go'aanka cabashada Gobolka ee ay soo saarto USBE waa kama danbays oo rafcaan lagama qaadanayo. Hadii dhinac uu ku qanci waayo go'aanka cabashada Gobolka, tallaabadooda wax ka beddel waa inay xareeyaan cabashada nidaamka oo dalabka dhagaysiga taas oo ay shardi u tahay in dhanka dacwoonaya uu xuquuq u leeyahay inuu cabashada nidaamka ah xareeyo ee arrinta dhinucu uu dooda ka qabo.

TALLAABOOYINKA WAX KA BEDDELKA DIIDMADA ADEEGYADA MUNAASABKA AH

Xalinta cabashada Gobolka ee la ogaaday in aan la bixin adeegyada munaasabka ah, USBE waa inay ka jawaabtaa:

1. Sida dib loogu saxayo diidmada adeegyadaas, oo ay ku jiraan, hadba sida ay u habboon yihiin, ku abaalmarinta magdhow lacageed ama talaabooyin kale oo sixitaana oo ku habboon baahida ardayga.
2. Siin mustaqbalka oo ku haboon adeegyada dhamaan ardayda laxaadka la'.

CABASHOOYINKA GOBOLKA IYO DHAGAYSIGA CABASHADA NIDAAMKA

Hadii cabasho Gobol la helo oo la mawduuc ah dhegaysiga cabashada nidaamka sida ay dhigayaan Shuruucda, ama ay ku jiraan dhawr arrimood oo hal ama wax ka badan ay qayb ka yihiin dhagaysigaas, USBE waa inay dib ugu dhigtaa wixii qayb ah ee kamid ah cabashada Gobolka ee lagaga jawaabay dhagaysiga cabashada nidaamka ilaa inta lasoo gunaanadayo. Wixii arrimo ah ee cabashada Gobolka ah ee aan ka qayb ahayn dhegaysiga cabashada nidaamka waa in la xaliyo iyada oo la isticmaalayo muddada iyo nidaamyada cabashada Gobolka ee lagu sharraxay qaybtan.

1. Hadii ay dhacdo in cabashada Gobolka ama qayb kamid ah cabashada Gobolka dib loo dhigo iyada oo laga war sugayo natiijada dhegaysiga cabashada nidaamka sida kor lagu sheegey, 60 maalmood muddada ah sida lagu sheegey Sharciga IV.E.6. ayaa la hakin doonaa taariikhda USBE iyo LEA ama hay'ada shacabka ee kale ay labaduba helaan nuqul cabashada nidaamka oo ay dalbadaan dhagaysiga.

2. Hadii ay dhacdo in dalabka dhagaysiga nidaamka la xidhiidha laga noqdo ama sida kale loo joojiyo iyada oo aanu jirin dhib, 60 ka maalmood ayaa dib u bilaabmi doono maalinta shaqo ee ku xigta, oo cabashada Gobolka ama mushkiladaha hore loo sheegey ee hoos yimaada ayaa la baadhi doonaa oo lagu xalin doonaa muddadan 60 ka maalmood ah ee wax laga beddelay.

Hadii mushkilad ka timaado cabashada Gobolka ee loo xereeyey si hoos timaada Sharciga IV.E. ee hore loo go'aamiyay dhagaysiga cabashada nidaamka ee ay ku jiraan isla dhinacyada, kadib go'aanka dhagaysiga ayaa laga war sugayaa arrintaas. USBE waa inay u sheegtaa labada dhinac arrintan. Cabashada Gobolka ee sheegeysa in dugsiga ama hay'ada shacabku ay dhaqan gelin wayday go'aanka cabashada nidaamka, si walba ha noqotee, waa in si toos ah loogu gudbiyaa Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah oo ay xallisaa USBE.

Waalidka ama ardayda dadka waawayn ah iyo shakhsiyaadka kale ee danaynaya, oo ay ku jiraan xarumaha tobobarka iyo macluumaadka waalidka, xarumaha nolosha madaxa banaan, hay'adaha ilaalinta iyo u ololaynta, hay'adaha xirfadlayaasha, iyo hay'adaha kale ee munaasabka ah, waa in loo sheegaa nidaamyada iyada oo loo marinayo:

1. Wargelinta dhawritaanada habraaceed ee uu bixiyo dugsigu.
2. Bandhiga iyo dhacdooyinka tobobarka kale ee shaqaalaha USBE ay ku qabteen Gobolka.
3. Kaalmada farsamo ee shacabka si foolka-fool ah, iimeel ahaan, ama onleyn ahaan lagu siiyey waalidka, ardayda dadka waawayn ah, iyo shakhsiyaadka iyo hay'adaha daneynaya ee kale.

DHEXDHEXAADIN (34 CFR § 300.506; SHURUUCDA IV.F.)

NIDAAMYADA DHEXDHAXAADINTA GUUD

Dugsi, USBE, ama hay'ad kale oo shacabka ah oo kastaa ee ka masuulka ah waxbarashada ardayda qaba laxaad la'aanta waa inay xaqiijiyaan in nidaamyada la sameeyay oo ay dhaqan geliyaan si ay ugu ogolaadaan dhinacyada in la xaliyo muranka ku saabsan wixii arrin ah ee hoos yimaada IDEA iyo Shuruucda, oo waxaa kamid ah arrimaha ka yimaada xaraynta cabashada nidaamka, si loo xaliyo muranka nidaamka dhexdhexaadinta.

Dhinacyada la dhaxdhexaadinayo waxaa kamid noqon kara LEA ama hay'ad kale oo shacab iyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah si loo xaliyo muranka arrimaha hoos yimaadda Qaybta B ee IDEA ama Shuruucda oo ay ku jiraan arrimaha hore u dhacay ama la xidhiidha xaraynta cabashada Gobolka ama dalabka dhagaysiga cabashada nidaamka.

Marka ay hesho dalabka dhexdhexaadin USBE, USBE waxay bilaabi doontaa dadaalka wacyi gelinta ee ay ku ogaysiinayso dhinaca aan soo gudbin dalabka sadex maalmood oo shaqo gudaheed.

1. Wixii dalab dhexdhexaad ah ee la gudbiyo maalmaha fasaxa todobaadkii, maalmaha ciidaha, ama maalmaha kale ee aan shaqo ahayn waxaa laga shaqayn doonaa oo loo arkaa in la heley maalinta shaqo ee xigta.
2. Wixii dalab dhexaadin ah ee la helo wixii ka danbeeya 5:00 galabnimo saacada mountianee maalinta shaqo waxaa laga shaqayn doonaa oo loo arkaa in la heley maalinta shaqo ee xigta.
3. Hadii ay dhacdo in labada dhinac ay ku heshiiyaan dhexdhexaadin, USBE waxay ku qori doontaa dhexdhexaadiye shan maalmood oo shaqo gudahood marka lagu heshiiyo dhex dhexdhexaadinta.

SHURUUDAHA DHEXDHEXAADINTA

Nidaamku waa inuu xaqiijiyaa in nidaamka dhexdhexaadintu:

1. Uu yahay ikhtiyaar dhanka dhinacyada;
2. Aan loo adeegsan in lagu diido ama dib loogu dhigo waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, xuquuqdiisa dhagaysiga ee waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, cabashadiisa nidaamka, ama loogu diidin wixii xuquuq ah ee uu ku heleyo IDEA; oo
3. Uu qabtaa dhexdhexaadiye xirfad leh oo dhexdhexaad ah oo lagu tobobaray farsamooyinka dhexdhexaadinta wax ku oolka ah.

Dugsigu waxa uu samayn karaa nidaamyo lagu siinayo waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsiyada doortay in aanu isticmaalin nidaamyada dhexdhexaadinta fursad ay ku kulmaan. Kulanka waa inuu noqdaa:

1. Mid ka dhaca wakhtiga iyo goobta u haboon waalidka ama ardayga qofka wayn ah;
2. uu qabtaa dhinac aan dan ka lahayn natiijada:
    a. Kaas oo heshiis kula jira hay'ad xallin muran oo kale oo habboon; ama
    b. Xarunta tobobarka iyo macluumaadka waalidka ama xarunta khayraadka waalidka bulshada ee Gobolka; iyo
    c. Ee sharaxaysa faa'idooyinka, oo dhiiri gelinaysa isticmaalka, nidaamka dhexdhexaadinta waalidka ama ardayga qofka wayn ah.

Dhexdhexaadiyuhu waxa aweeye shakhsi xirfad u leh oo dhexdhexaad ah oo fududaynaya doodaha sirta ah si loo gaadho xalinta muranka ee labada dhinac ku heshiiyeen. Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah ama cida uu wakiishay waxay haysaa liiska shakhsiyaadka aqoonta u leh dhexdhexaadinta ee yaqaana shuruucda iyo qawaaniinta la xidhiidha bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. Sidoo kale:

1. Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah ama cida uu u wakiishay waxay ku xulataa dhexdhexaadiyayaasha si qori tuur ah, wareegto ah ama qaabab kale oo dhexdhexaad ah.
2. USBE waxay bixinaysaa kharashka nidaamka dhexdhexaadinta, oo waxaa kamid ah kharashaadka kulamada lagu sheegey qaybtan.
3. Madal kasta oo nidaamka dhexdhexaadinta waa in la qabtaa balanteeda si waafaqsan wakhtiga oo waa in lagu qabtaa meel u haboon dhinacyada muransan.

Wada hadalada dhaca wakhtiga uu socdo nidaamka dhexdhexaadinta waa inay noqdaan sir oo looma adeegsan karo cadaymo ahaan wixii dhagaysi cabashada nidaamka, cabashada Gobolka, ama dacwad madani ah ee maxkamada federalka ama maxkamada Gobolka ah ee danbe.

1. Sirta waxaa loo bixiyaa toos oo waxba kama bedeli karaan dhinacna dhexdhexaadinta la samaynayo ee hoos yimaada Qaybta B ee IDEA ama Shuruucdan.
2. Shuruudahan sirtu waxay waajib yihiin iyada oo aan loo eegeynin hadii dhinacyadu ay ku xaliyeen murankoodii nidaamka dhexdhexaadinta.

Hadii dhinacyada ku xaliyeen murankoodii nidaamyada dhexdhexaadinta, dhinacyadu waa inay soo saaraan heshiis sharci ah oo lagu sheegayo in la xaliyo oo:

1. Lagu sheegayo xallintaas oo sheegaya in dhamaan wada hadalka dhacay intii uu socday nidaamka dhexdhexaadintu uu noqon doono sir oo aan loo adeegsan karin cadayn ahaan wixii dhagaysi cabashada nidaamka ama dacwad madani ah ee ka danbeeya ee is afgaran waagaas ah; iyo
2. Waxaa saxeexa waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo wakiilka dugsiga awooda u leh inuu waajib saaro hay'addaas.

Heshiiska dhexdhexaadinta qoran, ee saxeexan ee qaybtan hoos yiimada waxa uu dhaqan gel ka yahay maxkamad gobol oo kasta oo sharci fulin leh ama maxkamada degmada Maraykanka.

DHEXDHEXAADNIMADA DHEXDHEXAADIYAHA

Shakhsiga noqonaya dhexdhexaadiyaha:

1. Ma noqon karo shaqaale USBE ama dugsiga oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ardayga; iyo
2. Waa in aanu yeelan dan shaqo ama shakhsiyeed taas oo khilaafaysa dhexdhexaadnimada qofka.

Qofka sida kale ugu qalma dhex dhexaadinta maaha shaqaale dugsiga ama USBE kaliya maadaama oo qofka uu ka qaato mushahar hay'ada uu ugu adeegayo dhexdhexaadiye.

NIDAAMKA CABASHADA NIDAAMKA

XARAYNTA CABASHADA NIDAAMKA (34 CFR § 300.507; UCA 53E-7-208; SHURUUCDA IV.G.)

NIDAAMKA XARYNTA CABASHADA NIDAAMKA EE GUUD

Shuruucda Utah waxay dhigayaan in danta ay ugu jirto ardayda laxaadka la' in la siiyo nidaam xalinta muranka oo degdega ah oo dhexdhexaad ah oo kama danbays ah wixii ka yimaada xuquuqda iyo barnaamijyada waxbarashada iyo masuuliyada ardayga laxaadka la', waalidkii, iyo dugsiga shacabka (UCA 53E-7-208(1)).

Cabashada nidaamka (sidoo kale waxaa looga yaqaan Dhawritaanadan Habraaceed iyo Shuruucda "dalabka dhagaysiga cabashada nidaamka") waxaa loo xarayn karaa arrimaha la xidhiidha aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarashada ee ardayga qaba laxaad la'aanta ama siinta FAPE ardayga.

Waalidka, ardayga qofka wayn ah, ama dugsigu waxay xarayn karaan cabashada nidaamka ee arrimaha la xidhiidha soo jeedinta ama diidmada isbedelka aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarashada ee ardayga laxaadka la', ama siinta FAPE ardayga.

Cabashada nidaamka waa in lagu sheegaa xad gudubka dhacay wax aan ka badnayn laba sano kahor taariikhda waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsigu ogaaday ama ay ahayd inuu ogaado talaabada lagu sheegey inay tahay ta looga duulay cabashada nidaamka, marka laga tago:

1. Hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ah laga hor istaagay inuu xareeyo cabashada nidaamka maadaama oo ay jirtay wax si khaldan uu ugu sheegey dugsiga oo lagu xaliyay mushkilada ah meesha looga duulay cabashada nidaamka; ama
2. Dugsigu waxa uu ka qariyay macluumaadka waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee loogu baahnaa IDEA in la siiyo waalidka.

U OLOLAYNTA IYO WAKAALADA SHARCIGA AH

Dadka khibrada gaarka ah u leh, waxaa kamid ah qareenada, waxay gacan ka gaysan karaan ama waxay u raaci karaan labada dhinac midkood dhegaysiga cabashada nidaamka. Dhinacyada waxaa:

1. Matali kara looyar haysta fasaxa uu kaga shaqaynayo sharciga ee Gobolka Utah; ama
2. Iyaga ayaa is matali kara, sidoo kale waxaa loo yaqaan qofka isku ah looyarka (Shuruucda Guddiga Qareenada Utah 14-102-111, 14-802(c)(8)).

MACLUUMAADKA WAALIDKA LOOGU TALO GELEY

Dugsigu waa inuu u sheegaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah wixii adeegyada sharciga ama adeegyada kale ee la xidhiidha ee bilaash ah ama qiimo jaban ah ee aagga laga heli karo haddii waalidka ama ardayga qofka wayn ah uu dalbado macluuumaadka; ama waalidka ama ardayga qofka wayn uu dalbado dhagaysi hoos yimaada qaybtan.

CABASHADA NIDAAMKA (34 CFR § 300.508; SHURUUCDA IV.H.)

NIDAAMYADA CABASHADA NIDAAMKA EE GUUD

Dugsigu waa inuu leeyahay nidaam ku waajibinaya dhinac, ama looyarka matalaya dhinac, inay siiyeen dhinaca kale cabashada nidaamka (taas oo ay tahay in la ilaaliyo sirteeda).

1. Dhinaca xaraynaya cabashada nidaamka waa inuu u diraa nuqulka cabashada nidaamka Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah oo gacanta uga geeyaa, ugu diraa Boosta Maraykanka, ama faakis ugu diraa.

MACLUUMAADKA CABASHADA

Cabashada nidaamka waa inay ku jiraan:

1. Magaca ardayga;
2. Cinwaanka guriga ee ardayga;
3. Magaca dugsiga ardaygu uu dhigto;
4. Marka la eego kiiska ardayga ama qofka dhalinyarta ah bilaa guriga ah, macluumaadka xidhiidhka ee ardayga ee la heli karo iyo magaca dugsiga uu ardaygu uu dhigto;
5. Faahfaahin nooca dhibaatada ardayga ee la xidhiidha soo jeedinta ama beddelka la soo jeediyey ama la diiday, ooy ku jirto xaqiiqooyin la xidhiidha dhibaatada; iyo
6. Xalinta lagu taliyay ee mushkilada ilaa inta la garanayo oo uu heli karo dhinaca wakhtigan.

OGAYSIISKA LOO BAAHANYAHAY KA HOR DHEGAYSIGA CABASHADA HANAANKA

Dhinaca waxaa dhici karta in aanu yeelan dhegaysiga cabashada hannaanka illaa dhinaca, ama looyarka matalaya dhinaca, uu xareeyo cabashada nidaamka oo buuxinaysa shuruudaha ku qoran kor.

KU FILAN CABASHO

Cabashada nidaamka ee loogu baahan yahay Shuruucda IV.H. waa in loo arkaa inay ku filan tahay iyada oo dhinaca loo dirayo wargelinta cabashada nidaam uu ku wargeliyo saraalka dhagaysiga iyo dhinaca kale iyada oo qoraal ah, 15 maalmood gudaheed oo ka bilaabmaysa marka uu helo cabashada nidaamka, in dhinaca helayaa uu u arko in cabashada nidaamku ayna buuxin shuruudaha.

Shan maalmood gudahood marka la helo wargelinta, sarkaalka dhagaysigu waa inuu go'aamiyaa wajiga cabashada nidaamka hadii nidaamka cabashadu uu buuxiyay shuruudaha oo waa inuu ku wargeliyaa isla markaba dhinacyada iyada oo qoraal ah go'aankaas.

WAXKA BEDELKA CABASHADA

Dhinac waxa uu ka bedeli karaa cabashada nidaamka kaliya hadii:

1. Dhinaca kale uu ku ogolaado qoraal wax ka bedelka oo la siiyo fursad uu ku xalinayo cabashada nidaamka kulan xalinta muranka ah; ama
2. Sarkaalka dhagaysigu uu bixiyo ogolaanshaha, marka laga tago in sarkaalka dhagaysiga uu keliya bixin karo ogolaanshaha wax ka bedelka wakhti aan ka danbeynin shan maalmood oo shaqo kahor inta aanu bilaabmin dhagaysiga nidaamku.

Hadii dhinac uu xareeyo cabashada nidaamka oo wax laga bedeley, mudada kulanka xalinka iyo mudada lagu xalinayo cabashadu waxay bilaabmaysaa markale marka la xareeyo cabashada nidaamka wax laga bedeley.

JAWAABTA LEA EE CABASHADA NIDAAMKA

Hadii dugsiga aanu wargelin qoraal ah oo hore aanu u dirin waalidka ama ardayga qofka wayn ah wixii ku saabsan arrinta ku jirta cabashada nidaamka waalidka ama ardayga, LEA waa inay, mudo toban maalmood ah gudahood oo ka bilaabmaysa helitaanka cabashada nidaamka, u dirtaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah jawaabta ay ku jirto:

1. Sharaxaad sababta uu dugsigu u soo jeediyey ama ku diiday in uu qaado talaabada lagu soo qaaday cabashada hanaanka;
2. Faahfaahin ikhtiyaarada kale ee Kooxda IEP ay ka fekertay iyo sababaha ikhtiyaaradaa loo diiday;
3. Faahfaahin hab, qiimeyn, diiwaan, ama warbixin kasta oo qiimeyn oo dugsigu u adeegsaday in uu sees uga dhigo talaabada lagu talo bixiyay ama la diiday; iyo
4. Faahfaahinta sababaha kale ee quseeya talaabada lagu talo bixiyey ama la diiday ee dugsiga.

Hadii dugsiga aanu wargelin qoraal ah oo hore aanu u dirin waalidka ama ardayga qofka wayn ah wixii ku saabsan arrinta cabashada nidaamka waalidka ama ardayga ilaa inta cabashada nidaamka la heleyo, dugsigu waxa uu cadeyn karaa in nidaamka cabashada waalidka ama ardayga ayna ku filnayn, meesha ay ku haboon tahay.

JAWAABTA CABASHADA NIDAAMKA EE DHINACA KALE

Dhinaca heleya cabashada nidaamka waa inay, toban maalmood gudaheed oo ka bilaabmaya marka ay helaan cabashada, u diraan dhinaca kale jawaabta si gaar ah uga hadlaysa arrimaha ka yimaada cabashada nidaamka.

NIDAAMKA XALINTA (34 CFR § 300.510; SHURUUCDA IV.J.)

KULANKA XALINTA

15 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya helitaanka wargelinta waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, ee cabashada nidaamka, iyo kahor inta aan la bilaabin dhagaysiga cabashada nidaamka, dugsigu waa inuu u qabtaa kulan waalidka ama ardayga qofka wayn iyo xubinta ku lug leh ama xubnaha Kooxda IEP ee aqoonta gaarka ah u leh macluumaadka lagu sheegey cabashada nidaamka oo:

1. Waxaa ku jira wakiilka dugsiga awooda u leh inuu go'aan ka gaadho isaga oo ku matalaya dugsigaas; iyo
2. Waxa aan kamid noqon karin looyarka dugsiga iyada oo waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu la socdo moojee looyar.

Ujeedada kulanku waa in waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah inay ka wada hadlaan cabashada nidaamka, iyo macluumaadka laga duulayo ee cabashada nidaamka, si markaa dugsigu uu fursad ugu helo uu ku xalinayo muranka asalka u ah cabashada nidaamka.

Kulanka xalinta looma baahna in la qabto hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsigu ay ku heshiiyeen qoraal ay kaga tanaasuleen kulanka, ama waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsigu ay ku heshiiyeen isticmaalka nidaamka dhexdhexaadinta.

Waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsiga ayaa go'aamiyay xubnaha ku lug leh ee Kooxda IEP inuu ka qayb galo kulanka.

MUDADA XALINTA

Hadii dugsigu aanu xalin cabashada nidaamka oo aanu ku qancin waalidka ama ardayga qofka wayn ah 30 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya marka uu helo cabashada nidaamka, dhagaysiga cabashada nidaamka ayaa dhici kara. Marka laga

reebo sida lagu sheegey Shuruucda IV.J.9., mudada laga soo saarayo go'aanka ugu danbeeyaa waxay bilaabantaa wakhtigay ku eeg tahay 30-kan maalmood.

Dugsigu waa inuu u sheegaa sarkaalka dhagaysiga iyo Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah (ama cida uu wakiisho) dhamaan kulamada xalinta qorshaysan iyo kuwa la dhameeyay si loo xaqiijiyo u hogaansanka mudada xalinta.

Marka laga tago meesha dhinacyadu iyaga oo wada jir ah ay ku heshiiyaan ka tanaasulka nidaamka xalinta ama isticmaalka dhexdhexaadinta, in waalidka ama ardayga qofka wayn ahi uu xarayn waayo cabashada nidaamka ee ka qayb galka kulanka xalinta waxa uu dib u dhigi doonaa mudada nidaamka xalinta iyo dhagaysiga cabashada nidaamka ilaa inta kulanka la qabanayo.

Hadii dugsigu aanu awoodin inuu helo ogolaanshaha ka qayb galka waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee kulanka xalinta kadib marka uu sameeyo dadaal macquul ah (oo uu duwaan geliyo isaga oo isticmaalaya nidaamka Shuruucda III.G.3.) dugsigu waxa, dhamaadka 30 maalmood, dalbadaan in sarkaalka dhagaysigu uu meesha ka saaro cabashada nidaamka waalidka ama ardayga, qofka wayn ah.

Hadii uu dugsigu ku qaban waayo kulanka xalinta 15 maalmood oo ka bilaabma marka uu helo wargelinta waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, ee cabashada nidaamka ama uu ka qayb geli waayo kulanka xalinta, waalidka ama ardaygu waxa uu dalban karaa wax ka qabadka sarkaalka dhagaysiga oo ah inay bilaabanto mudada dhagaysiga cabashada nidaamka.

45 maalmood mudada ah ee dhagaysiga cabashada nidaamku waxay bilaabmaysaa hal maalin kadib dhacdooyinka soo socda:

1. Labada dhinac ay ku heshiiyaan iyada oo qoraal ah inay ka tanaasulaan kulanka xalinta;
2. Kadib marka uu bilaabmo kulanka dhexdhexaadinta ama xalintu, laakiin kadib marka ay dhamaato mudada 30 maalmood ah, dhinacyadu ay ku heshiiyaan iyada oo qoraal ah in aanu heshiis macquul ahayn;
3. Hadii labada dhinac ay ku heshiiyaan iyada oo qoraal ah inay sii wadaan dhexdhexaadinta dhamaadka mudada 30 maalmood ah ee mudada xalinta, laakiin gadaal waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsigu ay ka noqdaan nidaamka dhexdhexaadinta.

HESHIISHKA XALKA OO QORAN

Hadii xalinta muranka lagu gaadho kulanka, dhinacyadu waa inay dhaqan geliyaan heshiis sharci ah oo ay saxeexaan waalidka ama ardayga qofka weyn ah iyo wakiilka dugsiga ee awooda u leh inuu matalo dugsiga oo awoodna u leh in uu waajib saaro

dugsiga oo waxa uu dhaqan gal ka noqoyaa maxkamada Degmada ee maamulka deegaanka ama maxkamada degmada ee Maraykanka.

MUDADA DIB U EEGIDDA HESHIISKA

Hadii dhinacyadu ay heshiis dhaqan geliyaan, dhinaca waxa uu kaga bixi karaa heshiiska sadex maalmood oo shaqo gudahood oo ka bilaabmaya marka heshiiska la dhaqan geliyo.

DHEGAYSIYADA CABASHOOYINKA NIDAAMKA

DHAGAYSIGA NIDAAMKA OO DHEXDHEXAAD AH (34 CFR § 300.511; SHURUUCDA IV.K.)

Markasta oo nidaamka cabashada la xareeyo, waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsiga muranka ka qaybta ah waa inay u helaan fursad dhagaysiga nidaamka oo dhexdhexaad ah.

Dhagaysiga nidaamka ee dhexaadka ah waa inay qabtaan USBE. Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah waa inay kormeeraan dhamaan dhagaysiyada cabashada nidaamka si ay u xaqiijiyaan in loo hogaansamo nidaamka waajibka ah.

SARKAALKA DHAGAYSIGA DHEXDHEXAADKA AH

Maamulaha Gobolka Waxbarashada Gaarka ah ama wakiilkiisu waa inuu magacaabaa sarkaalka dhagaysiga dhexdhexaadka ah si qori tuur ah, oo waafaqsan nidaamyada USBE.

Ugu yaraan, sarkaalka dhagaysigu waa in:

1. Aanu noqon shaqaale USBE, dugsiga oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ardayga; ama
2. Aanu ahayn qof leh dan shaqo ama shakhsiyeed taas oo khilaafaysa dhex dhexaadnimada qofka dhagaysiga;
3. Leeyahay aqoon, oo uu awood u leeyahay inuu fahmo, bixinta IDEA iyo Shuruucda, shuruucda Federalka iyo Gobolka ee la xidhiidha IDEA, iyo turjubaada sharciga ah ee IDEA ee maxkamadaha Federalka iyo Gobolka;
4. Uu leeyahay aqoonta iyo awooda inuu qabto dhagaysiga si waafaqsan nidaamka sharciga ee munaasabka ah, ee caadiga ah; oo
5. Uu leeyahay aqoonta iyo awooda bixinta iyio qorista go'aanka si waafaqsan nidaamka sharciga ee munaasabka ah, ee caadiga ah.

Qofka sida kale ugu qalma qabashada dhagaysiga maaha shaqaale hay'ada kaliya maadaama oo qofka uu kaga qaato mushahar hay'ada ahaanshaha sarkaalka dhagaysiga.

MOWDUUCA DHEGAYSIGA CABASHADA HANAANKA

Dhinaca codsada dhageysiga cabashada nidaamka kuma soo qaadi karo arimo dhegaysiga cabashada nidaamka aan lagaga hadlin cabashada hanaanka, iyadoo dhinaca kale ay waafaqaan mooyee sida kale.

WAKHTIGA CODSASHADA DHAGEYSI

Waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsigu waa inay dalbadaan dhagaysiga dhexdhexaadka ah ee cabashada nidaamka laba sano gudahood oo ka bilaabanta taariikhda waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsigu ogaaday ama ay ahayd inuu ogaado talaabada lagu sheegey inay tahay ta looga duulay cabashada nidaamka.

KA REEBENAYAALKA WAKHTIGA

Mudada lagu sharaxay Shuruucda IV.G.4. ma khusayso waalidka ama ardayga qofka wayn ah hadii waalidka ama ardayga qofka wayn ah laga horjoogsaday inuu xareeyo cabashada nidaamka taas oo ay sabab u tahay:

1. Majaro habaabinta gaarka ah ee dugsiga ee ah in uu xaliyey mushkilada ah shayga looga duulayo cabashada nidaamka; ama
2. Dugsigu waxa uu qariyay macluumaadka waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee loogu baahnaa in la siiyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah.

XUQUUQDA DHAGAYSIGA (34 CFR § 300.512; SHURUUCDA IV.L.)

XUQUUQDA DHAGAYSIGA GUUD

Waalidka ama ardayga qofka weyn ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan cid ku matasha dhagaysiga cabashada nidaamka. Sidoo kale, wixii dhinac ah ee dhagaysiga ama rafcaanka qaatay (oo waxaa kamid ah dhagaysiga la xidhiidha nidaamka anshax marinta) waxay xaq u leeyihiin in:

1. Uu la socdo oo uu la taliyo looyar iyo shakhsiyaad leh aqoon gaar ah ama tobobar qaba oo la xidhiidha mushkiladaha ardayga qaba laxaad la'aanta;
2. Inuu joogo isaga oo ku metelaya dhagaysiga cabashada nidaamka looyar haysta fasaxa uu kaga shaqaynayo sharciga ee Gobolka Utah;
3. Soo bandhigaa cadaymo oo ku waajahaa, maragga dhinaca kale su'aalaha, oo uu goobta soo xaadiriyo markhaatiga;
4. Mamnuucaa keenista cadayn kasta wakhtiga dhageysiga taas oo aan loo shaacin dhinacaas ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dhageysiga;
5. Ka qaataa diiwaan ah qoraal, ama iyada oo lagu salaynayo ikhtiyaarka waalidka ama ardayga qofka wayn ah, ah elektoroonig, xaraf-raac; oo
6. Ka qaataa go'aanada xaqiiqooyinka iyo go'aanada oo ah qoraal, ama iyada oo lagu salaynayo ikhtiyaarka waalidka ama ardayga qofka wayn ah, ah elektoroonig.

SHAACINTA DHEERAADKA AH EE XOGTA

Ugu yaraan shan maalmood oo shaqo kahor dhagaysiga, dhinac walba waa in uu siiyaa dhamaan dhinacyada kale dhamaan qiimaynta lagu buuxiyay taariikhdaas iyo talooyinka ku salaysan qiimaynta dhinaca bixinaya in dhinaca doonayo inuu ku isticmaalo dhagaysiga.

Sarkaalka dhagaysiga waxa uu ka joojin karaa dhinac inay soo bandhigto qiimaynta ama talada la xidhiidha ee aan lagu sheegin ugu yaraan shan maalmood oo shaqo kahor dhagaysiga bilaa ogolaanshaha dhinaca kale.

XUQUUQDA WAALIDKA EE DHAGEYSIGA

Waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee ku lug leh dhagasiga waa in la siiyaa xuquuqda ah in:

1. La keeno ardayga dhagaysiga lagaga hadlayo;
2. Loo furo dhagaysiga shacabka; iyo
3. In duwaanka dhagaysiga iyo waxa kasoo baxa iyo go'aanka lagu siiyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah si bilaash ah.

GO'AANKA DHAGAYSIGA (34 CFR § 300.513; SHURUUCDA IV.M.)

GO'AANKA SARKAALKA DHAGAYSIGA

Sarkaalka dhagaysiga waxa uu eegi doonaa hadii ardayga qaatay FAPE ay ku salaysan tahay waxa looga duulayo ee haboon.

Wixii arrin ah ee xad gudubka nidaamka ah, sarkaalka dhagaysiga waxa uu ogaan karaa in ardaygu aanu qaadan FAPE kaliya hadii ku filnaan la'aanta nidaameed:

1. Carqaladeeyey xuquuqda ardayga FAPE;
2. Si wayn uga carqaladeeyey waalidka ama ardayga qofka wayn ah, fursada ka qayb galka nidaamka go'aan gaadhida ee ku saabsan siinta FAPE ee ardayga; ama
3. Keenay waayitaanka nafciyadii waxbarasho.

Ma jiro wax ku jira Shuruucda IV.M.2. oo loo fasiran karo in uu u diido sarkaalka dhagaysiga inuu amro dugsiga in loo hogaansamo shuruudaha nidaamka.

DALAB GOONI AH OO DHAGAYSIGA CABASHADA NIDAAMKA AH

Waalidka ama ardayda qofka wayn ah waxay xaq u leeyihiin inay u xareeyaan si gaar ah cabashada nidaamka si ka soocan cabashada nidaamka hore loo xareeyay.

NATIIJOOYINKA IYO GO'AANKA LA GAADHSIIYAY GUDIDA LA TALINTA IYO DADWAYNAHA

Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah ama cida uu wakiishay, kadib marka la masaxo wixii macluumaadka haybta dadka sheegaya ee shakhsi ahaaneed, waa inay:

1. La wadaagaan natiijada iyo go'aamada cabashada nidaamka Gudida Latalinta Waxbarashada Gaarka ah ee Utah (USEAP); oo
2. U diyaariyaan natiijada iyo go’aamadaba oo ka dhigaan kuwa dadwaynuhu ku heli karaan onleyn ahaan.

KAMA DANBAYSNIMADA GO'AANKA (34 CFR § 300.514; SHURUUCDA IV.N.)

Go'aanka lagu gaadhay dhagaysiga la qabtay waa kama danbays iyada oo dhinac rafcaan ka qaato go'aanka moojee sida uu dhigayo sharciga madaniga ah ee 34 CFR § 300.516 iyo Shuruucda IV.Q.

QAABKA DHAQAN GELINTA GOBOLKA (34 CFR § 300.537; SHURUUCDA IV.O.)

Iyada oo ay jirto bixinta dhaqan gelinta garsooreed ee heshiiska qoraalka ah ee lagu gaadhay dhexdhexaadinta ama kulanka xalinta, ma jiro wax ka hor istaagaya USBE inuu istimaalo qaab kale oo lagu dhaqan gelinayo heshiiska, iyada oo ay shardi u tahay in isticmaalka qaabkan aanu ahayn waajib oo aanu dib u dhigaynin ama u diidaynin dhinac xuquuqdiisa inuu dalbado heshiiska qoraalka ah ee maxkamada Gobolka ee aaga ka talisa ama maxkamada degmada ee Maraykanka.

MUDADA IYO HABOONAANTA WAKHTIGA DHAGASIGA (34 CFR § 300.515; SHURUUCDA IV.P.)

Maamulaha Gobolka Waxbarashada Gaarka ah ama wakiilka waa in uu xaqiijiyaa wax aan ka danbaynin 45 maalmood oo kadib marka ay dhamaato 30 maalmood oo mudada xalintu, ama mudada la habeeyay ee ka timid nidaamka xalinta:

1. Go’aan kama dambaysaa in lagu gaadho dhageysiga; iyo
2. Nuqul ka mida go’aanka in loo diro dhinac kasta.

Sarkaalka dhagaysiga waxaa uu bixin karaa mudo kordhin gaar ah marka uu dalbado dhinac.

Dhagaysi kasta iyo naqdin kasta oo ka timaada muran afkana ah waa in la qabtaa wakhti iyo goobta u haboon waalidka iyo ardayga ku lugta leh.

Dhagaysiga Cabashada Nidaamka La Dedejiyay

Dhegaysiga cabashada nidaamka la dedejiyay waxa dalban kara waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsiga mararka soo socda (34 CFR § 300.532):

1. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee aan ku qancin wixii go'aanka anshax marinta ah ee keenaysa meelaynta (waxaa kamid ah go'aanka habdhismeedka waxbarashada kale ee ku meelgaadhka ah [IAES]), ama soo bandhiga go'aanka; ama
2. Dugsigu uu u arko in ardayga meelaynta hadda loosii wado kadib nidaamka ashax marinta ee 34 CFR §§ 300.530 iyo 300.531 ay u badan tahay inuu keeno dhaawac ardayga ama dadka kale.

Dhegaysiga cabashada nidaamka la dedejiyay waa inuu dhacaa 20 maalmood oo ka bilaabma taariikhda cabashada nidaamka la xareeyay (si waafaqsan shuruudaha cabashada ee Shuruucda IV.J). Sarkaalka dhagaysiga waa inuu go'aamiyaa toban maalmaha waxbarashada ah gudahood dhagaysiga kadib.

Iyada oo waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsigu ay ku heshiiyaan moojee si qoraal ah ka tanaasulka kulanka xalinta ama ku heshiiyaan moojee isticmaalka nidaamka dhexaadinta ee lagu sheegey 34 CFR § 300.506, kulanka xalintu waa inuu ku qabsoomaa todoba maalmood gudahood oo ka bilaabanta helitaanka wargelinta cabashada nidaamka, oo dhagaysiga cabashada nidaamka ayaa la wadi karaa iyada oo arrinka lagu xaliyay moojee si ay ku qancaan labada dhinac 15 maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka ay soo gaadho cabashada nidaamka.

Dacwada Madaniga ah (34 CFR § 300.516; Shuruucda IV.Q.)

Nidaamka Dacwada Madaniga ah ee Guud

Wixii dhinac ah ee aan ku qancin natiijada iyo go'aanka ee aan lahayn xuquuqda rafcaanka, iyo wixii dhinac ah ee ka cabanaya natiijada iyo go'aamada, waxay xaq u leeyihiin inay dacwad madani ah ka furtaan wargelinta cabashada iyada oo dalbanaya dhegaysiga cabashada nidaamka. Dacwada waxaa la hor gayn karaa maxkamada Gobolka ee aaga ama maxkamada degmada ee Maraykanka iyada oo aan eegeynin inta uu le'eg yahay khilaafku.

Dacwada madaniga ah waxaa laga xarayn karaa maxkamadda Gobolka ama maxkamada federalka; hadii rafcaan loo qaato maxkmaada Gobolka, racfaanka waa in lagu xareeyo 30 maalmood oo ka bilaabma taariikhda go'aanka dhagaysiga

cabashada nidaamka. Maxkamada degmadu waxay kusoo rogi kartaa xadidaad wakhti oo lamid ah (UCA 53E-7-208(4)(a)).

NIDAAMKA DACWADA MADANIGA AH EE DHEERAADKA AH

Wixii dacwad madaniga ah; maxkamadu:

1. Waxay heleysaa duwaanada nidaamka dacwada;
2. Dhagaysan doontaa cadaymo dheeraadka ah marka ay ka dalbadaan dhinac; oo,
3. Iyada oo salaynaysa go'aankeeda ahmiyada cadaynta, bixin doontaa caawimada ay maxkamadu go'aansato in ay habboontahay.

MAAMULKA MAXKAMADA DEGMADA

Maxkamada degmada ee Maraykanka waxay maamushaa dacwada lagu soo qaaday dhawritaanada habraaceed ee IDEA iyada oo aan loo eegeynin xadiga mushkilada hadhaw ka timaada.

SHURUUCDA DHISMAHA

Ma jiraan wax kamid ah Shuruucda oo mamnuuca ama xadida xuquuqda, nidaamyada, iyo tallaabooyinka wax ka beddel ee la heli karo ee hoos timaada Dastuurka, Sharciga Maraykanka Laxaadka La', 1990, Cinwaanka V ee Sharciga Dhaqan Celinta 1973, ama shuruucda kale ee Federalka ee ilaalisa xuquuqda ardayda laxaadka la', marka laga tago kahor inta aan la xaraynin dacwadda madaniga ah sida ay dhigayaan shucuudan lagu doonayo xalinta ee lagu heli karo dhawritaanada habraaceed ee IDEA, nidaamyadu waa in loo isticmaalaa si lamid ah sida dacwada lagu soo oogay dhawritaanada habraaceed ee IDEA oo kale.

KHARASHKA LOOYARKA (34 CFR § 300.517; UCA 53E-7-208(4)(B); SHURUUCDA I.V.R.)

NIDAAMYADA KHARASHKA LOOYARKA GUUD

Wixii talaabo ama nidaam ah ee ka yimaada dhawritaanada habraaceed ee IDEA, maxkamada, ayaa go'aan u leh, waxay siin kartaa kharash macquul ah oo looyarka ah oo qayb ka ah kharashka:

1. Dhinaca gacan sarreeya ee ah waalidka ardayga laxaadka la' ama ardayga qofka wayn ah;
2. Dhinaca gacan sarreeya ee ah USBE ama dugsiga ka dhanka ah looyarka waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee xareeyay cabasho ama keeney dacwad madani oo aan haboonayn, macquul ahayn ama bilaa sal ah, ama ku

qaaday looyarka waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee weli sii wada kadib marka ay cadaatay inayna haboonayn, macquul ahayn ama ayna sal iyo raad lahayn; ama

3. Dhinaca gacan sarreeya ee USBE ama dugsiga ee ka dhanka ah looyarka waalidka ama ardayga qofka wayn ah, ama ka dhanka ah waalidka ama ardayga qofka wayn ah, hadii waalidka ama ardayga, qofka wayn ah, uu dalbado dhagaysiga cabashada nidaamka ama ay marka danbe keento dacwad leh ujeeda aan haboonayn, sida dhibaatayn, in la keeno dib u dhac aan haboonayn, ama korodh badan oo aan loo baahneyn oo kharashka sharciga ah.

Deeqda lacagta ee IDEA waa in aan loo adeegsan kharashka looyarka ama kharashaadka dhinaca ee la xidhiidha dacwada ama nidaamka dhawritaanada habraaceed ee IDEA. Dugsigu waa inuu isticmaalaa deeqda hoos timaada IDEA marka uu samaynayo talaabada ama nidaamka hoos yimaada dhawritaanada habraaceed ee IDEA.

BIXINTA KHARASHKA

Maxkamada ayaa siisa kharash macquul ah looyarka siday dhigayso dhawritaanada habraaceed ee IDEA oo waafaqsan waxyaabaha soo socda:

1. Kharashka la bixiyey waa in uu ku salasyanaadaa sicirka ka jira bulshada dhexdeeda taas oo nidaamka dacwada ka dhacday nooca tayada adeegyada la bixinayo.
2. Ma jirto bakhshiis ama kurdhin loo adeegsanayo xisaabinta kharashka la bixiyey.
3. Kharashka looyarka lama bixin kari, oo kharashaadka la xidhiidha waxaa dhici karta in aan la isku gudin, wixii talaabo ah ama nidaam ah ee adeegyada la qabtay ee ku xiga wakhtiga bixinta qoran ee lagu xalinayo waalidka ama ardayga qofka wayn dalabkiisa hadii:
    a. Bixinta la sameeyey mudada lagu sheegey Sharciga 68 ee Shuruucda Federalka ee Dacwada Madaniga ah ama, marka la eego dacwada maamulka, wakhti aan ka badnayn toban maalmood kahor inta aan la bilaabin dacwada;
    b. Bixinta lagu aqbalin toban maalmood gudahood; iyo
    c. Maxkamada ama sarkaalka dhagaysiga maamulka uu ogaado in ka gurmadka ugu danbeeya ee uu helay waalidka ama ardayga qofka wayn ah ayna ahayn sidii ay doonayeen waalidka ama ardayga qofka wayn marka loo eego wixii marka hore lagu heshiiyay.
4. Kharashka looyar waxaa dhici karta in aan loo siinin wixii la xidhiidha kulanka Kooxda IEP iyada oo kulanka loo qabto moojee natiijada dacwada maamulka

ama talaabada maxkamada awgeed, ama waxaa xaq u leh bixintiisa Gobolka, ee wixii dhexdhexaadinta ah ee hoos yimaada 34 CFR § 300.506.
5. Kulanka xalinta waa in aan loo arag kulan loo qabtay natiijada dhagaysiga maamulka ama talaabada maxkamada awgeed oo sidoo kale looma arko inuu yahay dhagaysiga maamulka ama talaabada maxkamadeed wixii ah ujeedo kharashka looyarka ee qaybtan.
6. Bixinta kharashka looyarka iyo kharashaadka la xidhiidha waxaa la siin karaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah ee dhinaca gacan sarreeyey ah ee sheegey cudurdaarka diidmada xalka loosoo bandhigay.

Maxkamadu waxay yaraynaysaa, sida waafaqsan, xadiga kharashka looyarka ee la siiyay, hadii maxkamadu ay ogaato in:

1. Waalidka ama ardayga qofka wayn ah, ama looyarka waalidka ama ardayga, inta ay socoto dacwadu ama maxkamadu, marka si aan macquul ahayn looga baxo xalka ugu dsanbeeya ee khilaafka;
2. Xaddiga kharashka qareenka ee haddii kale la ogolyahay in la siiyo si aan macquul ahayn uga badan yahay heerka saacadiiba ah ee ka jira bulshada adeegyada la midka ah ee ay qabtaan qareenada leh xirfadda, sumacada, iyo khibrada;
3. Wakhtiga lagu qaatay iyo adeega sharci ee la bixiyay waxay ahaayeen xad dhaaf marka loo eego sida ay tahay dacwadu; ama
4. Looyarka matalaya waalidka ama ardayga qofka wayn ah ma uu siinin dugsiga macluumaadka ku haboon ee wargelinta dalabka cabashada nidaamka si waafaqsan 34 CFR § 300.508.

Hadii dhinacyadu ay u suurto geliwaydo inay heshiis gaadhaan ama bixiyaan kharashka looyarka, markaa dhinaca raadsanaya in loo celiyo kharashka looyarka ee dacwada maamulka ee waxbarashada gaarka ah sida uu dhigayo 20 USC § 1415(i) waa in ay u xareeyaan dacwada maxkamada 30 maalmood gudahood kadib marka go'aanka nidaamka lasoo saaray (UCA 53E-7-208(4)(b)).

Shuruucda sare ee ku saabsan kharashaadka looyarka ma khuseeyaan wixii talaabo ama nidaam ah hadii maxkamadu ogaato in Gobolka ama dugsigu ay si aan macquul ah u gaadheen xalka kama danbaysta ah ee dacwada ama talaabada ama ay u aragto inay jiraan ku xad gudub dhawritaanada habraaceed ee IDEA ah.

Xaalada Ardayga Wakhtiga Dacwada (34 CFR § 300.518; Shuruucda IV.S.)

Inta laga war sugayo wixii dacwad maamul ama maxkamadeed ee ku saabsan dalabka dhagaysiga cabashada nidaamka, iyada oo dugsiga iyo waalidka ardayga

ama ardayga qofka wayn ah ogolaado moojee, ardayga ku taxaluuqa cabashada waa inuu ku jiraa meesha waxbarasho ee uu wakhtigan ku jiro.

Hadii cabashu ay ku saabsan tahay arjiga qoraalka hore ee dugsiga shacabka, ardayga, marka ay ogolaadaan waalidka ama ardayga qofka wayn ah, waa inay la geliyaa dugsiga shacabka ilaa inta la dhamaystirayo dhamaan nidaamka dacwada.

Hadii go'aanka sarkaalka dhagaysiga ee dhagaysiga cabashada nidaamka ee uu qabtay USBE uu ku waafaqsan yahay waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn in beddel meelaynta ahi habboon tahay, meeleyntaas waa in loo arkaa heshiis u dhaxeeya dugsiga iyo waalidka ama ardayga qofka wayn ah.

NIDAAMYADA MARKA ARDAYGA ANSHAX MARINTA LA MARINAYO UU LAXAAD LA' YAHAY

AWOODA SHAQAALAHA DUGSIGA (34 CFR § 300.530; SHURUUCDA V.A. – C.)

Si waafaqsan shuruudaha IDEA iyo Shuruucda, dugsi kastaa waa inuu sameeyo, hayo, oo uu dhaqan geliyo siyaasadaha iyo nidaamyada anshax marinta ardayga qabta laxaad la'aanta.

“Anshax marinta” sida lagu isticmaalay Shuruucda, waxay ka dhigan tahay cawaaqibta uu dugsigu ku soo rogo ardayga ku xad gubna xeerka dugsiga ee habdhaqanka ardayga ama shuruucda ay sheegeen shaqaalaha dugsigu. Weedha "anshax marinta" ee lagu isticmaalo Shuruucdan kuma jirto isticmaalka jidh dilka oo waxaa mamnuucaya UCA 53G-8-302. Shuruucda I.E.12.

GO'AAMADA KIIS-KIIS

Shaqaalaha dugsiga waxay u eegi karaan wixii xaalado gaara ah kiis-kiis marka ay eegayaan isbadal lagu sameeyo meeleynta, taas oo waafaqsan Shuruucda V.B., ay ku haboon tahay ardayga qaba laxaad la'aanta ee ku xad gudbay xeerka anshaxa ardayga.

NIDAAMYADA GO'AAMINTA GUUD

Shaqaalaha dugsiga waxay ka saari karaan ardayga laxaadka la' ee ku xad gudba xeerka anshaxa meelaynta wakhtigan ee ardayga oo waxay u wareejin karaan IAES ku haboon, habdhismeed kale, ama ka hakin karaan, wax aan ka badnayn toban maalmood oo waxbarasho (ilaa inta ikhtiyaarkan kale lagu dabaqo ardayga aan laxaad la'ayn), iyo ka saaritaan dheeraad ah oo aan ka badnayn toban maalmood oo waxabrasho oo iska isku sanad dugsiyeed ah habdhaqan xumo kale awgeed, ilaa inta ka joojintaasi ayna keeneynin is bedel meelaynta ah siday dhigayso ka joojinta anshax marinta ee lagu sheegey 34 CFR § 300.536 iyo Shuruucda V.D.

Marka ardayga qaba laxaad la'aanta laga saaro waxbarashada uu wakhtigan uu ku jiro mudo toban maalmood ah oo isku sanad dugsiyeed ah, wixii intaa ka danbeeyo ee maalmo ah ee laga saaro dugsiga waa in la siiyaa adeegyada ilaa inta uu dhigayo sharciga 34 CFR § 300.530(d) iyo Shuruucdan V.C.

AWOODA SHAQAALAHA DUGSIGA

Wixii isbadal ah ee anshax marin ku yimaadda meelaynta ee ka badan toban maalmood oo xidhiidh ah oo waxbarasho, hadii habdhaqanka ay ka timaaday xad

gudubka xeerka dugsiga la sheegey inayna ka iman muujin ah laxaad la'aanta ardayga (ka eeg Go'aaminta Muujinta hoos), shaqaalaha dugsiga waxay ugu dabbiqi karaan nidaamka anshax marinta la xidhiidha ee ardayga qaba laxaad la'aanta isla qaabka iyo muddada ay ku dabbaqaan ardayda aan laxaada la'ayn, marka laga tago wixii ka danbeeyo maalinta tobnaad ee ka saarista ee keenaya isbedelka meelaynta, dugsigu waa inuu siiyaa adeegyada ardayga sida lagu sheegey 34 CFR § 300.530(d) iyo Shuruucda V.C.

ADEEGYADA

Ardayga qaba laxaad la'aanta ee laga saaray meelaynta waxbarashada ardayga ee wakhtigan waa in:

1. Sii wadaa helida adeegyo waxbarasho si awood loogu siiyo ardayga in uu sii wato ka qaybgalka manhajka guud ee waxbarashada, in kastoo ay tahay meel kale, oo ku horumaro gaadhida yoolasha IEP-ga ardayga; iyo
2. Si munaasab ah, u helo, qiimaynta habdhaqanka shaqada (FBA), iyo adeegyada waxka qabadka habdhaqanka iyo wax ka bedelka loogu talo geley in lagaga jawaabo xad gudubka habdhaqanka si ayna markale u dhicin.

Adeegyada waxaa lagu bixin karaa IAES.

Dugsiga waxaa kaliya looga baahan yahay inuu siiyo adeegyada mudada laga saaray dugsiga ardayga qaba laxaad la'aanta ee laga saaray meelaynta wakhtigan mudo toban maalmood ah ama wax ka yar sanad dugsiyeedkaas, hadii ay siinayso adeeygo ardayga aan qabin laxaad la'aanta ee si lamid ah looga saaray.

Kadib marka ardayga qaba laxaad la'aanta laga saaro meelaynta waxbarasho ee wakhtigan mudo toban maalmood ah oo isku sanad ah, hadii wakhti xaadirkan ka saaridu ayna ka badnayn toban maalmood oo xidhiidh ah oo waxbarasho oo ayna bedelin meelaynta sida uu dhigayo 34 CFR § 300.536 iyo Shuruucdan V.D., shaqaalaha dugsiga, isaga oo kala tashanaya ugu yaraan hal macalin oo ardayga ah, waxa uu go'aamin doonaa muddada adeegyada loo baahan yahay, si markaa loogu ogolaado ardayga inuu sii wado ka qayb galka manhajka waxbarashada guud, in kasta oo ay tahay habdhismeed kale, iyo hormarka dhanka buuxinta yoolasha lagu sheegey IEP-ga ardayga.

Hadii ka saarida ay tahay isbedelka meeleynta, Kooxda IEP ee ardayga ayaa go'aamin doonaa adeegyada habboon ee la siinayo mudada laga saaray.

ISBEDELKA MEELAYNTA EE KA TIMAADA KA SAARIDA ANSHAX MARINTA AH (34 CFR § 300.536; SHURUUCDA V.D.)

Ujeedada ka saaridu ardayga qaba laxaad la'aanta ee meelaynta waxbarashada wakhtigan ee ardayga, isbedelka meelayntu waxa uu dhacaa hadii:

1. Laga saaray wax ka badan toban maalmood oo shaqo oo xidhiidh ah, oo waxaa kamid ah maalmo gaaban oo waxbarasho; ama
2. Ardayga in badan laga saaray waxbarashada oo soo noqnoqda, oo waxaa kamid ah maalmo waxbarasho oo gaagaaban:
    a. Maadaamo oo kolba erigiisa badan ay ka beden tahay toban maalmood sanad dugsiyeedka;
    b. Maadaama oo habdhaqanka ardayga ay lamid tahay habdhaqankii ardayga ee hore ee dhacdada ee keeney ka saarida taxanaha ah; iyo
    c. Maadaama oo xaaladaha dheeraad ah sida mudada ka saarid kasta, wadarta wakhtiga ardayga laga saaray, iyo qiyaasta ka saarida ee midba midka kale.

Dugsigu waxa uu u go'aamiyaa kiis-kiis hadii qaabka ka saarida ay keeneyso isbedel meelaynta ah. Go'aankan waxa lagu samaynayaa dib u eegid inta uu socdo nidaamku iyo dacwada maxkamadu.

“Maalmaha waxbarasho ee gaagaaban,” sida lagu isticmaalay Shuruucda, waxay ka dhigan tahay maalmaha waxbarasho ee ardayga in kaliya ay yareeyeen shaqaalaha dugsiga ee ka jawaabaya habdhaqanka ardayga wixii ujeedo anshax marin ah, halkii ay ka noqon lahayd Kooxda IEP ee ardayga ama kooxda meelaynta, ardayga qaata FAPE. Guud ahaan, isticmaalka ka saarida rasmiga ah ee lagaga jawaabayo habdhaqanka ardayga, hadii lagu celceliyo sanad dugsiyeedka oo dhan, waxay keeni kartaa ka saarid anshax marin oo meelaynta wakhtigan ku jiro ah. Shuruucda I.E.11.d.

Sida lagu adeegsaday Shuruucdan, maalmaha waxbarasho ee gaagaaban waxay dhacaan marka maalinta waxbarasho ee ardayga keliya uu u yareeyo shaqaalaha dugsigu si looga jawaabo habdhaqanka ardayga oo ah ujeedo anshax marin, halkii ay ka noqon lahayd Kooxda IEP-ka ee ardayga ama kooxda meeleyna ardaygaas si uu u qaato FAPE.

Guud ahaan, isticmaalka ka saarida rasmiga ah ee lagaga jawaabayo habdhaqanka ardayga, hadii lagu celceliyo sanad dugsiyeedka oo dhan, waxay keeni kartaa ka saarid anshax marin oo meelaynta wakhtigan ku jiro ah. Markaa, nidaamka anshax marinta ee 34 C.F.R. §§ 300.530 ilaa 300.536 iyo Shuruucdan V. munaasab ayey noqon doonaan guud ahaan iyada oo sadexda xaaladood ee soo socda la buuxiyo moojee:

1. Ardayga waxaa la siiyay fursad uu kusii wadanayo ka qayb galka munaasabka ah ee manhajka guud;
2. Ardayga waxa uu weli qaadanayaa adeegyada lagu sheegey IEP-ga ardayga; iyo
3. Ardaygu waxa uu weli kala qayb galayaa caruurta aan laxaadka la'ayn ilaa inta ay ka heleyaan waxbarashada ay wakhtigan ku jiraan. 71 Fed. Reg. 46715 (Agoosto 14, 2006).

GO'AAMINTA BANDHIGA (34 CFR § 300.530; SHURUUCDA V.E.)

Toban maalmood gudahood marka wixii go'aan ah ee bedelka meelaynta ee ardayga laxaad la'aanta qaba uu soo baxo maadaama oo uu ku xad gudbay xeerka anshaxa ardayga, dugsiga, waalidka ama ardayga qofka wayn ah, iyo xubnaha kale ee ku lug leh Kooxda IEP-ga ardayga (sida ay go'aamiyeen waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsigu) waa inay eegaan dhamaan macluumaadka la xidhidha ee ku jira faylka ardayga, oo waxaa ku jira IEP-ga ardayga, wixii kormeer ah ee macalin ee kale, iyo macluumaadka la xidhiidha ee uu bixiyay waalidka ama ardayga qofka wayn si loo eego:

1. Hadii habdhaqanka laga hadlayo uu keeney, ama uu xidhiidh wayn oo toos ah la leeyahay, naafonimada ardayga; ama
2. Hadii habdhaqanka laga hadlayo uu ahaa natiijada tooska ee guuldareysiga dugsiga ee hirgelinta IEP-ga.

Habdhaqanka waxa la go'aamin doonaa inuu muujinayo naafanimada ardayga hadii dugsiga, waalidka ama ardayga qofka wayn ah, iyo xubnaha kale ee ku lug leh Kooxda IEP-ga ardayga ay go'aamiyaan in:

1. habdhaqanka uu keeney, ama uu xidhiidh wayn la leeyahay, naafonimada ardayga; ama
2. Habdhaqanka uu ka dhashay natiijada tooska ee guuldareysiga dugsiga ee hirgelinta IEP-ga.

Hadii dugsigu, waalidka ama ardayga qofka wayn ah, iyo xubin la xihdiidha Kooxda IEP-ga ardayga ay go'aamiyaan in habdhaqanku uu ka yimid inuu dugsigu dhaqan gelin waayay IEP, dugsigu waa inuu qaataa talaabooyinka munaasabka ah ee lagu xalinayo hoos u dhacaas.

GO'AANKA IN HABDHAQANKU AHAA MUUJINTA LAXAAD LA'AANTA ARDAYGA

Hadii dugsiga, waalidka ama ardayga qofka wayn, iyo xubnaha Kooxda IEP la xidhiidhaa ay go'aamiyaan in habdhaqanku ahaa muujin laxaad la'aanta ardayga, Kooxda IEP waa inay:

1. Labadan midkood sameeyaan:

a. Qabtaan FBA, iyada oo dugsigu sameeyay moojee FBA kahor habdhaqanka keeney isbedel meelaynta oo dhacay, iyo dhaqan geliyaa qorshaha waxka qabadka habdhaqanka (BIP) ee ardayga; ama
b. Hadii BIP hore loo sameeyay, ay eegaan BIP oo wax ka badal ku sameeyaan, sida loogu baahdo in lagaga jawaabo habdhaqanka.

2. Iyo, iyada oo dhaqanku uu hoos yimaado moojee xaaladaha gaarka ah sida lagu sharaxay hoos, waxaa lagu soo celinayaa ardayga meesha uu hore ugu jiray ee laga saaray, iyada oo waalidka ama ardayga qofka wayn ahi iyo dugsigu ay ku heshiiyaan moojee waxka bedelka meelaynta oo qayb ka ah wax ka bedelka BIP.

DURUUFO GAARKA AH

Shaqaalaha dugsiga waxay ka saari karaan ardayga IAES wax aan ka badnayn 45 maalmood oo waxbarasho iyada oo aan la eegeynin hadii habdhaqanku la go'aamiyay inuu ka yimid bandhiga laxaad la'aanta ardayga, hadii ardayga:

1. U soo qaato hub (eeg qeexida xaga hoose) ama hub ku haysto dugsiga, dhismaha dugsiga, ama u qaato ama ku haysto nashaadaadka dugsiga oo ku jirta aagga maamul USBE ama dugsiga;
2. Ula kac ahaan u haysto ama isticmaalo maandooriye aan sharci ahayn (eeg qeexida xaga hoose), ama iibiyo ama raadiyo walax mamnuuc ah, (eeg qeexida hoos), marka uu dugsiga joogo, dhismayaasha dugsiga, ama nashaadaadka dugsiga oo ku jirta aagga maamul USBE ama dugsiga;
3. U gaystay dhaawac halis ah (eeg qeexida hoose) qof kale markuu dugsiga joogay, dhismaha dugsiga, ama nashaadaadka dugsiga oo ku jirta aagga maamul USBE ama dugsiga;

QEEXITAANADA XAALADAHA GAARKA AH GO'AAMINTA BANDHIGA

Ujeedada qaybtan awgeed, qeexitaanada soo socda ayaa habboonaada:

Walax mamnuuc ah waxaa loo jeedaa dawooyinka ama walax kale aan la qaybin karin bilaa qoraal, ee lagu cadeeyay hoosta qoraalada I, II, III, IV, ama V gudaha qaybta 202(c) Xeerka Walxaha Mamnuuca ah (21 USC § 812(c)).

Maandooriye sharci darro ah micnaheedu waa walax mamnuuca; laakiin kuma jirto mukhaadaraadka ee sharci ahaan loo haysto, yeesho, ama loo isticmaalo iyada oo lagu jiro kormeerka xirfad yaqaan caafimaadka ah oo ruqsad haysta ama taasi oo si sharci ah loogu haysto ama isticmaalayo Xeerkaas Mukhaadaraadka (21 USC § 812) ama xeer kale oo hoos yimaada sharciga Federaaliga.

Dhaawac halis ah oo jidheed micnaheedu waa dhaawac jidh oo ku lug leh: halis muuqata oo dhimasho, xanuun xooga oo jidka ah, fool xumo dheeraatay oo

muuqata, khasaare mudo dheeraaday ama dhaawaca ka gaadhsiinta xubin, unug jidhka ah ama awoodda caafimaadka maskaxda (18 USC § 1365). Dhaawaca jidhka ee aadka u daran kuma jiraan dilaaca, naburada, gubadshada, jidhka oo qayb go'do, damqasho jidh, xanuun, ama laxaad la'aan shaqada xubin, unug jidhka ah, ama awoodda caafimaadka maskaxda ama wixii kale ee dhaawac ee jidhka ah, inta uu doono ha le'ekaado heerkulku (18 USC § 1365).

Hubka micnahiisu waa hub, qalab, aalad, alaab, ama walax, dhaqaaq samaynaysa ama aan samaynayn, taas oo loo adeegsado, ama si diyaara awood ugu leh, in ay dhimasho keento ama dhaawac jidhka ah oo halis ah, erey bixintan kuma jirto midida jeebka leh af ka yar 2.5 hiish (18 USC § 930).

WARGELINTA DHAWRITAANADA HABRAACEED (34 CFR § 300.530(H); SHURUUCDA V.F.)

Taariikhda la gaadho go'aanka si loo sameeyo ka saarida keeneysa isbedel meelaynta ardayga qaba laxaad la'aanta ah maadaama oo uu jabiyay xeerkii anshaxa ardayga, dugsigu waa inuu wargeliyaa waalidka ama ardayga qofka wayn ah go'aankaas oo uu waalidka ama ardayga qofka wayn ah siiyaa wargelinta dhawritaanada habraaceed.

GO'AAMINTA HABDHISMEEDKA (34 CFR § 300.531; SHURUUCDA V.G.)

Kooxda IEP-ga ardayga ayaa go'aaminaya IAES adeegyada hadii habdhaqanka keeney ka saarida aanu ka imanmuujin ah laxaad la'aanta ardayga, ka saarida keenin bedelka meelaynta, ama habdhaqanka hoos iman Xaalado Gaarka ah sida lagu sheegey Shuruucda V.E.5.

RAFCAANKA WAALIDKA, ARDAYGA QOFKA WAYN AH, AMA DUGSIGA (34 CFR § 300.532; SHURUUCDA V.H.)

NIDAAMKA RAFCAANKA GUUD

Waalidka ama ardayga qaba laxaad la'aanta ama ardayga qofka wayn ah ee aan ku qancin wixii go'aan ah ee ku saabsan meelaynta ama go'aanka bandhiga, ama dugsiga qaba in kusii jiritaanka meelaynta hadda ee ardaygu wakhtigan ay markaa keeni karto dhaawac ardayga ah ama dadka kale ah oo weyn, waxa uu rafcaan ka qaadan karaa go'aanka iyaga oo xaraynaya cabashada dhagaysiga cabashada nidaamka isla markaana dalbanaya dhegaysi.

AWOODA SARKAALKA DHAGAYSIGA

Sarkaalka dhagaysiga cabashada nidaamka waxa uu dhagaystaa oo uu go'aan ka gaadhaa rafcaanka. Marka uu go'aaminayo, sarkaalka dhagaysigu waxa uu:

1. Ku celin karaa ardayga qaba laxaad la'aanta meesha waxbarasho ee uu ku jiray ee ardayga laga saaray hadii sarkaalka dhagaysigu uu go'aamiyo in ka saaridu ay tahay xad gudub nidaamka anshax marinta ee hoos yimaada IDEA ama Shuruucda ama habdhaqanku uu muujinayo laxaad la'aanta ardayga; ama
2. Amr karaa u bedel meelaynta ardayga laxaadka la' IAES ku haboon wax aan ka badnayn 45 maalmood oo waxbarasho hadii sarkaalka dhagaysigu uu u arko in meelaynta wakhtiga oo loosii wadaa ay hadhaw keeni karto dhaawac ardayga ah ama dadka kale ah.

Habka rafcaanka waa lagu celin karaa haddii ay dugsigu aaminsantahay in ku celinta ardayga meelayntiisii hore ay si wayn u suuragal tahay in ay ku keento dhaawaac ardaygaaga ama kuwa kale.

DHAGAYSIGA CABASHADA NIDAAMKA EE LA DEDEJIYAY

Markasta oo dhagaysiga loogu dalbado nidaamyada anshax marinta, waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsiga muranka ka qaybta ah waa inay u helaan fursad dhagaysiga cabashada nidaamka oo dhexdhexaad ah.

Dugsiga ayaa ka masuul ah inuu la qorsheeyo dhagaysiga cabashada nidaamka ee la dedejiyay Maamulaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah, taas oo dhacda 20 maalmood oo waxbarasho gudaheed oo ka bilaabanta taariikhda dalabka cabashada ee dhagaysiga la xareeyay. Sarkaalka dhagaysiga waa inuu go'aamiyaa toban maalmaha waxbarashada ah gudahood dhagaysiga kadib.

Iyada oo waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsigu ay ku heshiiyaan moojee qoraal ahaan inay ka tanaasulaan kulanka, ama ay ku heshiiyaan moojee dhex dhexaadin:

1. Kulanka xalinta waa inuu dhacaa todoba maalmood gudahood oo ka bilaabma marka la helo cabashada nidaamka; iyo
2. Dhagaysiga cabashada nidaamka waxaa la samayn karaa ilaa inta si ay ku qancaan loo xalinayo labada dhinac 15 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya marka la helo cabashada nidaamka.

Dhinacyada waxaa macquul ah inayna ku heshiinin kordhinta mudada xalinta si loo xaliyo cabashada nidaamka ee la dedejiyey. Markaa, marka dhinacyadu ay ka qayb galaan kulanka xalinta ama ka qaybqaataan dhexdhexaadinta oo muranka aan la xalin ilaa heer ay ku qancaan labada dhinac 15 maalmood gudahood oo ka

bilaabanta marka ay helaan cabashada nidaamka, dhagaysiga cabashada nidaamka ee la dedejiyay ayaa lagu socon doonaa.

Sarkaalka dhagaysiga waxaa dhici karta in aanu kordhin mudada si uu ugaadho go'aanka dhegaysiga cabashada nidaamka ee la dedejiyey.

Go'aamada dhagaysiga cabashada nidaamka ee la dedejiyay waa kama danbays, iyada oo ay buuxiyaan moojee shuruudaha 34 CFR § 300.514(b) ama 34 CFR § 300.516.

Meelaynta Mudada Rafcaanka (34 CFR § 300.533; Shuruucda V.I.)

Marka rafcaanka cabashada nidaamka ay gudbiyaan waalidka ama ardayga qofka wayn ah ama dugsigu, ardaygu waa inuu ku sii jiraa IAES inta la sugayo go'aanka sarkaalka dhagaysiga ama ilaa inta la gaadhayo mudada ay ku eeg tahay ee lagu shaxaray cinwaanka Awooda Shaqaalaha Dugsiga, kolba ta soo horeysa, iyada oo waalidka ama ardayga qofka wayn ah iyo dugsiga (ama USBE hadii ay ku haboon tahay) si kale ku heshiiyaan moojee.

Badbaadada Ardayda aan Weli u Qalmin Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada la Xidhiidha (34 CFR § 300.534; Shuruucda V.J.)

Badbaadada Guud

Ardayga aan la go'aamin inuu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee hoos yimaada IDEA ee sameeyay habdhaqanka ku ah xad gudubka xeerka anshaxa ardayga, waxa uu difaac ka heli karaa wixii badbaado ah ee lagu sheegey wargelintan hadii dugsiga uu ogaa in ardaygu uu yahay arday laxaad la' kahor habdhaqanka sababay anshax marinta dhacday.

Seeska Aqoonta Looga Duulayo Arrinta Anshax Marinta

Dugsigu waa in loo arko in uu aqoon u leeyahay in ardaygu yahay arday laxaad la' kahor habdhaqanka sababay talaabada anshax marinta ee dhacday, hadii:

1. Waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ahi uu ku muujiyo walaac qoraal ahaan oo uu u diro horjoogaha ama shaqaalaha maamulka ee dugsiga ee munaasabka ah, ama macalinka ardayga, oo ah in ardaygu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha;
2. Waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah uu dalbado qiimaynta ardayga; ama

3. Macalinta ardayga, ama shaqaalaha kale ee dugsiga, ay ugu sheegaan walaacyada gaarka ah ee qaabka habdhaqanka uu muujiyay ardayga si toos ah maamulaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ama shaqaalaha horjoogaha kale ee dugsiga.

Waxyaabaha Laga Soo Reebey

Dugsiga looma arki doono in uu aqoon u leeyahay in ardaygu uu yahay arday qaba laxaad la'aan hadii:

1. Waalidka ardayga ama ardayga qofka wayn ah:
    a. Aan loo ogolaan in qiimaynta lagu sameeyo ardayga; ama
    b. Loo diiday adeegyada hoos yimaada IDEA; ama
2. Ardayga lagu sameeyay qiimayn oo la ogaaday in ardaygu aanu lahayn laxaad la'aan sida lagu muujiyay IDEA.

Xaaladaha Khuseeya Hadii Ayna Jirn Wax Looga Duulo Aqoonta

Hadii dugsiga aanu u lahayn aqoon in ardaygu uu yahay arday qaba laxaad la'aan kahor inta aan la qaadin talaabo anshax marin ah oo ka dhan ah ardayga, ardayga waxaa la marin karaa talaabada anshax marin ee la mariyo ardayga aan qabin laxaad la'aanta ee sameeya habdhaqan lamid ah.

Hadii la dalbado qiimaynta ardayga mudada ardayga la marinayo talaabo anshax marin, qiimaynta waa in loo sameeyaa si la dedejiyay.

Ilaa qiimaynta la dhameeyo, ardaygu waxa uu ku jirayaa meelaynta waxbarasho oo ay go’aamiyeen masuuliyiinta dugsigu, kuwaas oo ay ku jiri karaan ka hakin ama ka eryid aan lahayn adeeg waxbarasho.

Hadii ardayga la ogaado inuu yahay arday qaba laxaad la'aan, iyada oo lagu xisaabtamayo macluumaadka qiimaynta uu sameeyay dugsiga iyo macluumaadka uu bixiyey waalidka ama ardayga qofka wayn ah, dugsigu waa inuu bixiyaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

U Gudbinta iyo Talaabada Bilayska iyo Awood Maxkamadeed (34 CFR § 300.535; Shuruucda V.K.)

Ma jiraan wax ku jira IDEA oo ka horjoogsan kara in dugsigu uu gaadhsiiyo wixii danbi ah ee ardayga laxaadka la' uu sameeyay maamulka ay khusayso ama ka hor joogsada in bilayska iyo maxkamadaha gobolku inay waajibaadkooda gutaan ee ku saabsan dabbaqidda sharciga federaalka iyo gobolka ee danbiyada uu geley ardayga laxaadka la'i.

GUDBINTA DIIWAANKA

Dugsiga ka warbixinaya dambiga uu galay ardayga laxaadka la' waa inuu xaqiijiyaa in nuqulada waxbarashada gaarka ah iyo duwaanada anshax marin ah ee ardayga loo gudbiyo si ay u eegaan maamulka ku haboon ee dugsiga uu gaadhsiinayo dambiga.

Dugsiga ka warbixinaya danbiya siday dhigayso qaybtan waxa uu u gudbin karaa nuqulada wxbarashada gaarka ah ee ardayga iyo duwaanada anshax marinta kaliya ilaa inta gudbintaas uu ogol yahay FERPA.